JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA

SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| sannadka 6aad | Cadadka Gaar ah | 06/01/2018 |
|---|---|---|


## Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka Xeer Lr. 49/2010


Email: garyaqaankaguud@gmail.com

Web.www.garyaqaankaguud.com


Lama iibin karo

Not for sale

Sannadka 2018

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-5252/112017** **DATE....19/11/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0878/112017

## Dhaqan-galka Wax-Ka-baddelka iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka, Xeer Lr. 49/2010

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, Go'aan Lr. GW/G/KF-34/745/201, ee ku taariikhaysan 31/10/2017, ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-baddelka iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka, Xeer Lr.49/2010;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka, Xeer Lr.49/2010.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-34/745/2017

Date: 27/09/2017

**Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Wax-ka bedelka iyo kaabista Xeerka Biyaha Qaranka**

**Xeer (No.49/2010)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:-** | Qodobada **54aad** (4), **11aad**, 12aad, **18aad**, **iyo 78aad.** ee Dastuurka. |
| **Markuu Tixgaliyay:** | Baahida loo qabo soo saarista, horumarinta adeega isticmaalka biyaha. |
| **Markuu Ogaaday:-** | Muhiimada uu xeerkan u leeyahay kor u qaadida khayraadka iyo ka faa'idaysiga biyaha. |
| **Markuu Garawsaday:-** | In biyuhu ay dan u yihiin nolosha Aadamaha gaar ahaan dadka iyo dalka. |
| **Markuu u Arkay:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:49/2010** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnayd **13/08/2017.** |
| **Markuu Arkey:-** | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:49/2010** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhaysnaa **11/09/2017.** |
| **Markuu Arkay:-** | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samaynin kuna ansixiyeen lix iyo sodon **(35)** cod Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka JSL **(Xeer LR:49/2010)** |

## WUXUU

Halkan kuugu soo gudbinayaa Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka JSL **(Xeer Lr.49/2010)**

## ALLAA MAHAD LEH

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Baashe Maxamed Faarax |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada | Gudoomiyaha Golaha Wakiilada |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAHA GUURTIDDA

REPUBLIC OF SOMALILAND
HOUSE OF ELDERS

Tell: 00 252 2 4424396
Tell: 00 252 2 4424943

Website: www.guurti.org
Email: contact@guurti.org

*Address: Main Street, Sha'ab Area, Near Presidential Palace, Guurti House Hargeisa, Somaliland.*

Ref. GG/JSL/G-02/09 /2017

Date: 11/09/2017

**UJ:- GO'AANKA ANSIXINTA WAX-KA-BEDELKA & KAABISTA-**

**XEERKA BIYAHA QARANKA XEER(NO.49/2010**

## GOLAHA GUURTIDDU

**Markuu Arkay:-** Qoddobadda Dastuurka ee 61aad Farqadiisa 2aad & 77aad/78 ee hab-raaca Xeer- dejinta.

**Markuu Arkay:-** Baahida loo qabo soo saarista, horumarinta adeega isticmaalka biyaha.

**Markuu Ogaaday;-** Muhiimada uu xeerkani u leeyahay kor u qaadida khayraadka & ka faaiidaysiga biyaha.

**Markuu dersay:-** In biyuhu ay dan u yihiin nolosha aadamaha gaar ahaan dadka, Xoolaha & dalka.

Wuxu Maanta oo ay Taariikhdu tahay: **11/09/2017** G/Guurtiddu Cod Aqlabiyad ah ku ansixiyey Wax-ka-Bedelka & Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka **Xeer No. 49/2010**, ee Golaha Wakiiladu u soo Gudbiyey Golaha Guurtidda iyada oo aanu Golaha Guurtiddu Wax-ka-bedel ku Samaynin, tiradda Kooramkuna ahayd:- 43 Xubnood, waxayna natiijaddii cod-qaadistu muujisay sidan hoos ku xusan:-

| Ogol | Diidan | Aamus |
|---|---|---|
| 35 | 06 | 01 |

**Guddoomiyuhunama u coddayn sida caaddadu tahay.**

Allaa Mahad Leh

Siciid Jaamac Cali — Ku-simaha Guddoomiyaha G/Guurtidda

C/naasir Aaden Beegsi — Xoghayaha Guud G/Guurtida JSL

# GOLAHA WAKIILLADU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay** | Qodobka 11aad, 12aad, 38aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Qaranka JSL |
| **Markuu Arkay** | Baahida loo qabo soo saarista, horumarinta, adeegsiga iyo Isticmaalka Biyaha |
| **Markuu Ogaaday** | Muhiimada uu Wax ka badal in lagu sameeyaa xeerkan u leeyahay kor u qaadida khayraadka iyo ka faa'idaysiga Biyaha. |
| **Markuu Garawsaday** | In Biyuhu ay daruuri u yihiin nolosha aadamaha gaar ahaan Dadka iyo dalka JSL |

## WUXUU WAX KA BADAL IYO KAABIS KU SAMEEYAY

## Xeerka Biyaha Qaranka JSL

## Xeer Lr. 49/2010

## CUTUBKA 1AAD

## Qodobka 1aad
## Macnaha Ereyada

**Ujuurada biyo saarka** — waa qiimaha uu qofku siinayo Hay'adda awooda u leh marka uu doonayo in uu biyo ka soo saaro ilaha kaydka dabeeciga ah

**Ruqsadda biyo Soo saarka** — Waa awood-bixin hay'adda u xilsaarani siiso qofka leh xuquuq biyood si uu biyo u soo saaro isagoo raacaya shuruudaha ku qeexan Qodobka 15.4

**Xeerka** — Macnihiisu waa xeerka Biyaha Qaranka

**Kayd biyo-hooseed (Aquifer)** — waa kayd-hayaha biyaha dhulka hoostiisa

**Balli** — waa dhul hooseeya oo dabeeci ah oo qabta ama kaydiya biyaha dhul Oogadiisa ka soo rogmadda, waxaa ka mid ah biyaha laga qabsado marka roobku da'o. Balli wuxuu noqon karaa mid ummadu leedahay ama mid qof gaar ah leeyahay

**Barkad** — waa biyo qabte dhulka kujira oo inta badan laga dhisay dhulka

hoostiisa oo loo Adeegsado inuu kaydiyo ama qabto biyaha ka soo rogmada marka roob da'o. Barkad waxa lahaan kara dadweyne ama qof gaar ah.

**Ceel** — waxa loola jeedaa ceel gacmeed gaar loo leeyahay

**Biyo Xeebeedyada Badda** — Macnaheeda waa biyaha badda oo xeebta ka baxsan marka laga reebo biyaha darayga ah ee gudaha dhulka iyo kayd-biyoodyada biyaha dhanaan ee dhulkahoostiisa.

**Shuruucda** — Waxa loola jeedaa shuruucda qaranka.

**Guddiga** — Waxa loola jeedaa Guddiga Siyaasadda Biyaha ee Qaranka.

**Hay'adda awooda u leh** — waxa loola jeedaa Wasaaradda Khayraadka Biyaha ama farac kasta oo dawli ah oo haysta awood sharciyeed oo ku salaysan Xeerkan biyaha.

**Sarkaal si rasmi ah awood Loo siiyay** — waa kormeere sare, baadhe ama xubin kale oo shaqaadawladeed ah

| | |
|---|---|
| | oo ka masuul ah in uu kormeero, fuliyo ama hirgaliyo arrin isagoo awooda ka helaya hay'adiisa oo ah jago cayiman oo dawli ah ama amar maamul oo tilmaamo leh |
| **Degmo** | Waxa loola jeedaa xafiiska biyaha degmada (distric water office) sida ku cad xeerka biyaha qaranka XEER Lam. 49/2011). |
| **Biyo siinta guryaha** | waxay dabooshaa baahida Biyaha si loo helo baahida guud ee dadku qabo biyaha marka lagu daro waraabka beeraha, guryaha, jardiinooyinka iyo xoolaha nool ee degaanku u baahan yahay. |
| **Warbaahiyaha Rasmiga ah** | Waxaa loola jeeda warbaahinta rasmiga ah ee dawladda Somaliland |
| **Biyo-dhul-hoosaad** | waxaa loola jeedaa kayd biyood oo dabeeci ah ama socda dhulka hoostiisa marka laga reebo kaydadka dadku sameeyo ama dhismayaasha la midka ah sida Barkadaha; waxaa ka mid ah biyo |

hayada ku yaalla dhulka xeebta ah.

**Haystada xuquuqda adeegsiga** Macnaheedu waa hay'ad dawli ah oo Wasaaradda u xilsaarta arrimaha biyuhu ama cidii kale ee ay Wasaaraddu u wakiilatay xuquuqda adeegsiga agabka biyaha ee dawladda ama nidaamka.

**Ku-duris** Macnaheedu waa dareere kasta oo lagu shubo biyaha oogada dhulka iyo kuwa dhulka hoose, si toos ah ama si dadban, iyadoo loo badheedhay ama aan loo kasin, haddii ay sadhaynayso ama aanay waxba yeelayn, iyadoo la marinayo beeb, kanaal, dhijaan ama hab kale oo gacanta lagu sameeyay.

**Ujuurada hehiiska (lease fee):** Macnaheedu waa lacagta uu bixinayo qaybiyaha adeegu isagoo heshiis ka haysta degmada ama hay'adaha kale (sida ku qeexan qodobka 28.4 kh) isagoo siinaya, haystaha xuquuqda

adeegsiga nidaamka biyaha.

**Hay'ada degaanka ah**

Waxa loola jeedaa wakaalada biyaha degaanka (local water Agency) sida ku cad xeerka biyaha qaranka (Lam 49/2011)

**Mayor**

Waa Guddoomiyaha Golaha Degaanka sida ku qeexan Xeer lam. 23/2002.

**Heerbegyada**

Heerbeegyadu waxay ka kooban yihiin hab kasta oo lagu Heshiiyey in nidaamyada ama adeegyada ku sifoobaan si ay u noqdaan kuwo bulshadu adeegsato ama isticmaasho, waxa ka mid ah heerbeegyada tayada biyaha (Water standards)

**Shakhsi**

waa biyo soo saarid sharci ah oo ay iska leeyihiin qof gaar ah, shirkad, iskaashato, ururo iskood isu abaabulay ama koox gaar ah oo danaynaya horumarinta ama maamulka biyaha iyagoo ah urur madaxbanaan, hantiilayaal degaan ah

sida tuulo, magaalo, wasaarad ama wakaalad ama qayb ka mid ah dawlada oo ah heer Qaran gobo lama degmo ama koox ajanabi ah ama hay'ad calami ama maxali ah.

**Sadhayn ama wasakhayn** — Macnaheedu waa wax kasta oo isbedel toos ah ama aan ahayn ku keeni kara tilmaamaha duleed, kimikeed ama bayoolojiyeed ee qayb ka mid ah degaanka ama ay ku shubistooda, ku daadintooda ama wixii ay soo daayeen ee wasakh iyo walxo kale ah ku yeellan karaan saamayn aan ku haboonayn adeegyada biyaha ama khayraadka kale ee dabeeciga ah ama wixii keeni kara xaalad khatar ku keeni karta deegaanka iyo caafimaadka iyo nolosha dadka, xoolaha iyo dhirta.
Intaa waxa dheer sadhowgu in uu yahay xaalad kasta oo wax yeelaysa, xadaynaysa ama xadidaysa tayada biyaha ee lagu tilmaamay Xeerka iyo shuruucda kale ee biyaha.

| | |
|---|---|
| **Sadheeye** | waa shakhsi kasta oo sadhow ku keeni kara biyaha. |
| **Gobol** | waa goob maamul degaameed sida ku Qeexan Xeer Lam 23/2002. |
| **Mulkiilaha daan biyo mareen** | waa lahaanshaha daana ama labada daamood ee wabiga ama dooxada |
| **Tilmaanaha gaarka ah** | Macnaheedu waa shuruud kasta oo farsamo ahaan laga rabo marka la dhisayo adeeg dawladeed waxaana ka mid ah tilmaamaha gaarka ah (Speification) ee marka la dhisayo ceel riig ah. |
| **Biyaha oogada Dhulka** | Macnaheedu waa biyo si joogta ah ama si googoos ah oogada dhulka u qulqula ama ku nasta dhulka korkiisa iyagoo ka hadhay biyo roobeed, waxa ka mid ah durdurada iyo balliyada |
| **Lacag bixin gaar ah** | Macnaheeda waa ganaax lacageed oo maamulka biyuhu jidaynayo in la bixiyo kadib markay caddaato |

in lagu xadgudbey heerkii ama xadayntii lagu bixiyey Xuquuqda Biyo-soo-saaridda.

**Guddiga Biyuhu** — Macnaheedu waa guddi madaxbanaan oo ay Wasaaraddu u doortay si ay u Kormeeraan heshiis shaqo. Waxay ka kooban yihiin wakii degaan oo ka socda daneeyayasha kala duwan ee dhinaca biyaha.

**Sicirka biyuhu** — Macnaheedu waa qiimaha ama tiro lacag qofka biyaha adeegsanayaa uu Siinayo biyo-qaybiyaha

**Unugga maaraynta Biyaha** — waa koox shaqaalaha degmada ah oo ay degmadu u xil saartay Hawgelinta iyo maaraynta adeegga biyaha iyagoo ka wakiil ah Degmada

**Biyo qaybiye** — waa qofka qaybinaya biyaha ama adeega biyaha si uu dakhli uga helo

**Khayraadka Biyaha** — waxay ka kooban yihiin biyaha oogada iyo dhulka hoostiisa ku jira marka lagu daro kuwa dabeeciga ah iyo kuwa

dadku sameeyo ee Harooyinka, Dooxyada, Kanaalada biyaha roobka, biyaha milixd laga saaray, biyaha la sifeeyay ama dib loo adeegsaday, kuwa dhijaamada ama meel sare ka soo shubma iyo biyaha xeebaha ee badda

**Xuquuq biyood** — Macnaheeda waa xaq uu leeyahay qofka haysta sharci biyo loogala soo bixi karo il-biyood si loogu adeegsado sideeda loo fulinayo xakamaynta biyaha iyo shuruucda kale; xaquuqaha biyaha waa in la diiwaan galiyo sida ku qeexan qodobka 12.

**Biyo qaybin** — Macnaheedu waa fidin adeeg biyood oo loogu talogalay in dadku baahidooda u adeegsado kuwa jiraan kuwa loo adeegsado waxyaabaha kale sida waraabka beeraha, xoolaha iwm.

**Shaqooyinka Biyaha** — Ama shaqooyinka horumarinta khayraadka biyaha waxa ka mid ah kanaaladda iyo

saaqiyadaha, biyo xidheenada sida balliyada, Barkadaha, ilaha biyaha sida ceelasha iyo riigaga, bambooyinka iyo rakibaadooda, dhuumaha biyaha, biyo weecinta sida naxarrada iyo moosaska barkadaha sifeeya biyaha iyo kuwa kala fadhiisiya, dhisme kasta oo loo sameeyay in biyaha lagu kaydiyo biyo mareen, biyo leexin, xakamayn ama biyo soo saarid loogu tallo galay inay ka celiyaan ilaha biyaha nabaad guurka iyo sadheeyayasha, iyo wax kasta oo loo adeegsado biayaha nooc kasta ha loo adeegsado ama shaqo biyood kasta oo lagu ilaaliyay shaqooyinka biyaha. Waxa loo qaybiyaa horumarinta biyaha dhulka hoose iyo biyaha oogada dhulka

**Qodobka 2aad**
**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa Xeerka Biyaha Qaranka Jamhuuriyada Somaliland

**Qodobka 3aad**
**Xadka Adeegsiga Xeerkan**

Xeerkan waxa uu koobayaa dhamaan xeerarkii ka horeeyay ee la xidhiidhay arrimaha biyaha waxaana loo adeegsanayaa maamulka biyaha qaranka Jamhuuriyada Somaliland

**Qodobka 4aad**
**Ujeedooyinka Xeerka Biyaha Qaranka**

1. Ujeedooyinka Xeerka waa: -

2. Xeerka biyuhu waa in la horumariyo helitaanka agabka biyaha iyadoo la raacayo habka joogtaynta nidaam-maamul oo loo simanyahay kuna salaysan noocyada kala duwan ee adeegga, agabka biyaha iyo badbaadinta degaanka.

b. In la aqoonsado, la sharciyeeyo, la xoojiyo laguna wargaliyo hay'adaha qaranka, nidaamka dhaqan dhaqaale ee biyaha Somaliland ee dhinaca maamulka biyaha iyo arrimaha xeerbeegtida t. In la aqoonsado, la sharciyeeyo, la xoojiyo Lana horgeeyo hay'adaha sharcisdejinta, xeer dhaqameedyada Somaliland iyo dhismayaasha hogaamiye dhaqameedyada Somaliland ee dhinaca maamulka biyaha, nidaam cashuureedka iyo arrimaha xeerbeegtida.

j. In lagu maamulo, maaraynta khayraadka biyaha iyo qaybinta adeegyada biyaha iyadoo la fulinayo, Lana hirgalinayo xeerkan biyaha iyo xeer hoosaadyadiisa.

x. In awood loo helo horumarinta istratijiyada qaranka ee dhinaca biyaha looguna turjumo qorsheyaal qaran si markaa loo qiimeeyo looguna daro qorshaha guud ee qaranka iyo ka faa'idaysiga deeqaha iyo iskaashiga caalamiga ah.

KH. In awood loo yeesho qorshayn iyo qiimayn guud oo ka wada dhexaysa barnamijyada Iyo mashaariicda khayraadka biyaha kuwaasoo fulintooda iyo dhismahooda loo Daynayo Wasaaradda khayraadka Biyaha iyo Wakaaladaha ay khusayso oo ah hay'adda qaranku u igmaday arrimaha Biyaha.

D. In loo sameeyo iskaashi dhexmara Wasaaradaha dawladda iyo hay'adaha madaxa bannaan ee ka hawl gala horumarinta iyo maamulka khayraadka biyaha iyo adeegsigooda.

r. In la qeexo waajibaadka iyo xuquuqda shakhsiyaadka ee khusaysa bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaan iyadoo biyaha loo adeegsanayo si habsami ah oo lagu jaangoynayo danta guud.

S. In la dhiirigeliyo lahaanshaha gaarka ah, gaar ahaanna nidaamka lahaanshaha wadajirka ah ee dawladda iyo dadweynaha [Public and Private Partnership – PPP]

## CUTUBKA 2AAD:

### Qodobka 5aad
### Mabaadi'da guud ee Xeerka Biyaha

1. dhawridda, horumarinta iyo kor u qaadista tayada biyaha iyo badbaadinta khayraadka biyaha, iyo sidoo kale habsami u adeegsiga khayraadkaasi
2. Adeegsiga khayraadka biyaha way reeban tahay iyadoo aan ruqsad loo haysan haddii aanay jirin duruufo xeerkani tilmaamay oo fasaxaya.

3. In la sameeyo habka sicir goynta biyaha (tacriifta) maadaama ay biyuhu yihiin badeecad xadidan oo leh ahmiyad bulsho iyo dhaqaaleba.
4. In la xoojiyo adeegyada biyo siinta gaar ahaan dib-u-adeegsiga biyo hore loo isticmaalay iyadoo la dhiirigalinayo samaynta agabyo ku haboon.

**<u>Qodobka 6aad</u>**
**<u>Xilka iyo waajibaadka Wasaaradda</u>**

1. Waajibaadka Wasaarada Macdanka iyo Biyaha waxaa ka mid ah: -

B) Dajinta xeer-hoosaadyada lagama maarmaanka ah, hab-maamulka iyo xal u helidda arimaha socodsiinta maamulka si loo fuliyo nuxurka ujeedooyinka uu xanbaarsan yahay xeerkani sida uu tilmaamayo qodobka 4aad.

T) Kormeeridda, fulinta shuruucda iyo maaraynta arrimaha khuseeya ka hortagida iyo xakamaynta sadhawga biyaha (wasakhaw).

j. Samaynta iyo hirgalinta nidaamyo farsamo iyo kuwa aan farsamo ahaynba ee heerbeegyada biyaha si loo ilaaliyo tayada adeegsiga biyaha iyadoo la adeegsanayo aqoon, qalab iyo farsamo ku haboon.

X. Hirgalinta iyo horumarinta heer-beegyada tayada biyaha la cabo oo ay ka mid yihiin biyaha warshadaysan iyo sidoo kale dib u adeegsiga biyaha isku dhafan (Biyaha ka soo noqda beeraha, bulaacadaha, biyaha wasakhda ah ee warshadaha iwm.) iyo sidii loo badbaadin lahaa loogana faa'idaysan lahaa biyo-hayaha, biyaha oogada, xeebaha, badaha iyo khayraadka kale ee biyaha.

kh. Samaynta iyo ilaalinta diwaanka dhamaan xuquuqda iyo waajibaadka biyaha la Xidhiidha oo dhamaystiran kana mid yihiin macluumaadka biyaha,

dhulka iyo habka dhaqan dhaqaale ee u gaarka adeegsiga biyaha.

D. Waajibaadka Wasaaradda khayraadka Biyaha waa lahaanshaha, ilaalinta hantida aasaasiga iyo ta aan aasaasiga ahayn iyo mas'uuliyada guud arrimaha biyaha dalka.

## CUTUBKA 3AAD:
## ADEEGSIGA BIYAHA IYO MACMIISH

### Qodobka 7aad
### Mabaadi'ida Adeegsiga Biyaha

1. Wasaaradda awoodda u lehi waa in ay ilaaliso, kantorooshona soo saarida iyo adeegsiga khayraadka biyaha.

2. Wasaaradda awooda u leh waa in ay dabaqdo nuxurka qodobada xeerkan iyo xeer-hoosaadka ay tahay in lagu dhaqo adeegsiga biyaha.

### Qodobka 8aad
### Wajibaadka macaamiisha Biyaha

1. Macaamiisha Biyuhu waa in ay ka warqabaan nuxurka Xeerkan Biyaha iyo shuruucda kale ee khuseeya biyaha.

2. Waa in biyaha loo adeegsado si wax ku ool ah oo dhaqaalayni ku jirto iyadoo la adeegsanayo farsamada, hab-nidaameedyada iyo dariiqooyinka ugu haboon. Waana in loo xanaaneeyaa agabka adeegsiga biyaha sida ugu fiican ee suurta galka ah.

3. Marka la adeegsanayo khayraadka biyaha waa in aan loo gaysan wax-yeelo iyo dhibaato dadka, xoolaha iyo degaankaba.

4. Waxa waajib ku ah macaamiisha biyaha inay ka ilaaliyaan wasakhda biyaha.

## CUTUBKA 4AAD
## XUQUUQDA BIYAHA IYO RUQSADAHA BIYO SOO SAARIDA

### Qodobka 9aad
### Lahaanshaha/wada lahaanshaha

**1.** Lahaanshaha khayraadka biyaha dabeeciga ah waxa loo igmaday Dawladda Somaliland oo uga wakiil ah muwaadiniinta Somaliland.Dawladduna waxay mas'uuliyadda u dhiibtay Wasaaradda Khayraadka Biyaha iyadoo raacaysa distoorka iyo XEERKAN Biyaha qaranka Lambar 49/2011

**2.** Isticmaalka khayraadka biyaha waa in lagu maamulo XEERKAN iyo shuruucda la xidhiidha ee ku haboon ee nidaamyada hab-maamulka Dawladda Somaliland.

### Qodobka 10aad
### Lahaanshaha gaarka ah

1. Gaar looma yeelan karo khayraadka biyaha dabiiciga ah sida: kayd biyood, webi, biyo fadhiisi, biyo mareen, iwm.
2. Khayraadka biyuhu waa hanti qaran, lagumana sheegan karo lahaansho dhul dhinca ku haya ama ku dhexyaal biyo sida Haro, Ceel, Bad, Doox, iwm.
3. Adeegyada khayraadka biyaha marka laga soo saaro kaydka dabeeciga ah ayuu adeegsigiisu noqon karaa Lahaansho gaar ah oo waafaqsan shuruucda biyaha.
4. Soo saaridda khayraadka biyaha wuxu mulkiiluhu ku iibin karaa si waafaqsan shuruucda biyaha, iibiyaha biyaha dadku cabayo waa inuu fuliyo shuruudaha ku xusan qodobka 45.1

## Qodobka 11aad
## Xaqa adeegsiga khayraadka Biyaha

1. Adeegsiga kharyraadka biyuhu waa xaqa isticmaalka xaddi go'an oo biyo ah oo lagala soo baxayo kayd-biyood ku yaala meel cayiman. Tilmaamaha gaarka ah ee xaqa adeegsiga biyaha waxa ka mid ah haystaha ruqsadda, goobta, ujeedada adeegsiga, xadiga, iyo tafaasiisha qalabka.
2. Ruqsada adeegsiga khayraadka biyaha waxaa haysan Kara wakaalad dawladeed, shakhsi gaar ah ama bulsho sida urur biyo-adeegsadeyaal.
3. Xeerka Biyuhu wuxu aqoonsanyahay dhamaan dhaqanka xuquuqda adeegsiga khayraadka biyaha ee aan ka hor imanayn sharciga.
4. Hadii uu jiro adeegsi hab dhaqan ah oo loo adeegsado khayraadka biyaha waa in loo diwaan galiyo sida ku xusan xeerkan qododbkiisa 12aad.
5. Biyo soo Saar kasta oo loo adeegsanayo qalab mishiin ah waa in marka Wasaaradda laga soo codsado diwaangelin sida ku xusan qodobka 12aad waana in loo diwaan galiyo haduu buuxiyo shuruudaha.
6. Ciddii hore loo diiwaangeliyey ka-shaqaysiga adeegsiga khayraadka biyaha, haddii hawlgalkeedu u baahanyahay waa inay codsato ruqsadda biyo soosaarida si waafaqsan qodobka 15aad.

## Qodobka 12aad
## Diwaangalinta xuquuqda Biyaha

1. Xeerkani wuxu tilmaamayaa in la diwaangaliyo dhamaan xuquuqda biyaha marka lagu daro, xuquuqda biyaha dhaqanka ah, haya'adda awooda u leh waa in ay ilaaliso oo ay saxid ku samayso diwaanka xuquuqda biyaha, diwaanku wuxu asaas u noqonayaa xalinta khilaafyada ku saabsan xuquuqda iyo adeegsiga khayraadka biyaha.

2. Waa in ay Wasaaraddu u magacawdo degmo kasta sarkaal biyaha ah, kaas oo u xilsaaran in uu sameeyo, ilaaliyo, xafido, soona bandhigi karo diwaanka xuquuqda biyaha degmada. Degmadu waa in ay nuqulka diwaanka oo saxan si joogto ah ugu soo gudbisaa Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha.

3. Lacag la'aan [bilaash] ayaa lagu maaraynayaa hawlaha kala ah: nidaamka diwaan galinta, shahaadada [shatiga] bilowga ah ee diiwangalinta iyo eegashada diiwaanka marka loo baahdo.

4. Haddii aanu ka hor-imanayn nuxurka faqrada 3aad ee qodobkan qof kasta oo u baahda inuu macluumaad kala baxo diwaanka, ujeeddo kasta ha ka lahaadee waa inuu ku bixiyo xafiiska sarkaalka biyaha degmada xaddi ujuuro ah oo maangal ah oo lagu caddayn doono xeerhoosaadyada xeerkan.

5. Wasaaradda u xil saaran arrimaha biyuhu waa in ay faafiso xeerhoosaadyada khuseeya habnidaameedka diiwaangalinta iyo ilaalinta diiwaanka. Xeer-hoosaadku waa inuu faahfaahiyo xaqa uu u leeyahay qof kasta in loo baadho diwaanka iyo nidaamka looga baahan yahay inuu u soo maro si loo saxo wax kasta oo ku qoran.

6. Qoraal kasta oo diiwaanka galay waa in uu ku siiyo tafaasiisha u gaarka ah xuquuqda biyaha oo ay ku jiraan taariikhda cabashada, diwaan galintooda, diidmada iyo wixii suurto gal ah ee la saxay iyadoo loo eegayo xuquuqdiisa.

7. Qof kasta oo codsada in loo diiwaangaliyo xuquuq biyo, oo hadda kadib lagu magacaabi doono codsade, waa inuu raaco nidaamka ku xusan qodabkan faqradiisa 5aad.

8. Haddii aanay ka hor imanayn qodobkan faqradiisa 7aad waa in la raaco habka hoos ku xusan.

B. Codsaduhu waa in uu arji u qorto sarkaalka u xil saran diiwaanka degmada isagoo buuxinaya foomka codsashada ee sarkaalku bixiyay.

T. Codsigaasi waa in lagu baahiyo warbaahinta rasmiga ah muddo aan ka yarayn bil kana badnayn seddex bilood.

J. Mudadaasi kor ku xusan dhexdeeda qofkasta oo codsigaa ka soo horjeedaa waa in uu ka diiwaan galiyo diidmadiisa, qoraal ahaan, xafiiska degmada.

X. Sarkaalku waa in uu ogaado diidmada, Lana tashado codsadaha iyo dhinacyada ay saamayso kadibna go'aan ku gaadho mudada ku xusan qodobka 12aad faqrada 8aad xarafka T.

KH. Hadii qo'aanka degmada lagu qanci waayo waa in loo gudbiyaa wasaaradda arrimaha gudaha ee degaanka si loo ogaado cidda mudan in xuquuqda loo diiwaan galiyo iyadoo la raacayo habka dhaqanka looga hortego isku dhac iyo dagaal dhexyimaada bulshada wada deggan

D. waa in sidoo kale loo gudbiyo xafiiska wasaaradda degaanka ee degmada si loo sugo in aan xuquuqda la diiwaan galiyay xaaluf ku keenayn degaanka.

R. Diwaan galinta xuquuqda biyuhu isma bedeli karto mana bedeli karto dabeecadda iyo ujeedada adeegsiga.

**Qodobka 13aad**
**Wareejinta, Baab'inta iyo Wax-ka bedelka Xuquuqda Biyaha**

1. Isbedel kasta oo lagu sameeyo tilmaamaha u gaarka ah xuquuqda biyuhu wuxuu u baahan yahay in lagu muujiyo diwaanka iyadoo la raacayo habnidaamka

loo saxo macluumaadka ku jira diwaanka ee ay dajisay Hay'adda Awooda u leh. Haystaha xuquuqda biyaha waxa laga rabaa inuu raaco taallabooyinka lama huraanka u ah in wax laga beddelo macluumaadka ku kaydsan diwaanka.

2. Dadka iska leh dhaxalka haysashada xuquuqda biyuhu way dhaxli karaan iyadoo la wafajinayo shuruucda ku haboon ee dhaxalka. dhaxlayaasha cusub waxa laga rabaa inay xafiiska degmada u soo gudbiyaan tilmaamaha u gaarka ah si loo saxo diiwaanka

3. Xuquuqda biyaha la diwaangaliyay waxa lagu wareejin karaa cid kale oo (seddexaad) iyadoo la waafjinayo hab nidaameedka ku xusan xeerkan ee ay tahay in la raaco.

4. Xuquuqda biyaha waa lala wareegi karaa markasta oo ay lamahuraan noqoto in biyaha loo adeegsado nidaam biyood ee dan guud ah iyo in loo adeegsado horumarinta ama kararida shaqooyinka biyaha gaarka loo leeyahay, si loo rakibo nidaam anfacaya danta guud.

5. Haddii ay dhacdo in lala wareego xuquuq biyood oo gaar ah waa in mulkiilaha xuquuqbiyoodka la siiyo magdhow u dhigma oo ay soo cadaysay Maxkamada awooda u lihi.

**Qodobka 14aad**
**Dejinta Khilaafyada la xidhiidha Xuquuqda Biyaha**

1. Haddii uu yimaado khilaaf la xidhiidha xuquuqda biyaha waa in la xoojiyo dariiqooyinka bulshadu ku xaliyaan arrimahan oo kale iyadoo lagu dabaqayo xeer dhaqameedka.

2. Haddii ay dhacdo in lagu guulaysan waayo in khilaafka lagu xaliyo faqrada 1aad ee qodobkan waa in loo gudbiyaa Maxkamadda awooda u leh.

**Qodobka 15aad**
**Ruqsadda Biyo soo saarka**

1. Dhamaan biyo soo saaridda iyo adeegsiga biyaha ee laga soo saarayo ilaha dabeeciga waa in laga helaa ogolaansho hay'adda awooda u leh in ay bixiso ruqsada soo saarida.

2. Wax ruqsad ah looma bixin karo haddii ay wax dhibaato ah u keenayso deegaanka dabiiciga ah sida:-.

B. Ka manaafacaadsi badan awooda biyaha dhulka hoostiisa ama oogadiisa ku kaydsan.
T. Biyo milix leh oo soo gala kaydka. j. Biyo dabiici u socda oo si aan la ogolayn loo leexiyo.
**X.** Haddii biyaha la hayaa keeni karaan in bulshada iyo xooluhu meel ku farabataan taasoo keeni karta nabaadguur farabadan ama khatar galinaysa ilaalinta dhulka daaqsinta ah iyo dhulka baadiyaha ah.
**Kh.** Haddii hawlahaasi keeni karaan adeegsiga kaydka biyaha oo dhan taas oo ka qaadaysa xuquuqda ay leeyihiin adeegsadyaasha degaan kale.

3. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyuhu waxay qeexi doontaa xaddiga lama dhaafaanka ah ee biyo soo saarista (threshold) ee haddii la dhaafo loo baahan yahay ruqsadda soo saarida biyaha oo u gaar ah. Xadigaas lama dhaafaanka ah ee la ogolyahay waxa lagu qeexi doonaa xeer- hoosaadka.
4. Ruqsadda soo saarista biyuhu waxay lagama maarmaan u tahay marka:-

**B.** Xadiga soo saarista shaqada biyuhu ka badan tahay xaddiga lama dhaafaanka ah ee la ogolyahay.

**T.** Biyaha la soo saarayo loogu talogalay nidaamka biyo siinta dadweynaha iyadoo aan la eegayn xadiga soo saarida.
**J.** Uu IL biyoodku ku yaallo meel cayiman oo lagu xakameeyey xeerkan.

5. Hay'adda awooda u leh bixinta ruqsadda biyo soosaaridu waa Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha oo u xilsaaran arrimaha biyaha ilaa ay Wasaaradda u igmato awoodan xafiiska degmada, xaalado gaar ah darteed, iyadoo la raacayo xeer hoosaadyada biyaha.

6. Marka la diwaan galinayo xuquuqda-biyaha ku shaqaynaya mishiinada, sarkaalka biyaha ee degmada ayaa go'aan ka gaadhaya in xuquuqda biyuhu u baahan yihiin ruqsadda soo saarisda, isagoo tixraacaya qodobkan faqradiisa 4aad, haddii ay sidaasi jirto, waxa uu siinayaa xaashida codsiga waxaanu ka caawinayaa codsadaha hab nidaameedka buuxinta codsiga.

7. Codsaduhu, si go'aan looga gaadho, wuxuu u gubinayaa codsigiisa hay'adda u wooda u leh ee ay u igmatay Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha.

8. Ruqsadda soo saaridda biyaha waa in lagu diiwaangeliyo diiwaanka guud oo lagu xafido Wasaarada u qaabilsan arrimaha biyaha.

9. Isbedel kasta oo lagu sameeyo macluumaadka ruqsadda soo saaridda waa in la diiwaangeliyo iyada oo la raacayo xeer hoosaadka biyaha.

10. Wasaaradda awooda u leh, waxay qorshe u dejinaysaa naqshadda iyo hababka ay u shaqaynayaan ceelasha riigga ah, ceelal meel ku wada yaal iyo Balliyo waaweyn. Qorshahaasi waa inuu tilmaamaa tafaasiil ay ku jiraan: goobta, tirada ceelasha, dhererka ugu badan iyo maaxda ugu badan.

11. Xaddiga la soo saarayo ee ku xusan ruqsadda ayaa lagu go'aaminayaa cashuurta laga qaadayo haddii ay jirto.

**Qodobka 16aad**
**Xadidaadaha, Joojinta ku meel gaadhka ah, La wareegida iyo baabi'inta.**

1. Waa sharci daro in la soo saaro xaddi biyo ah oo ka badan ka lagu tilmaamay xeerhoosaadyada iyadoon ruqsad loo haysan ama in la dhaafo xaddiga lagu caddeeyay ruqsadda. Soo saarka noocaas ahi waxay sababi kartaa in hay'adda awoodda u lehi la wareegto qalabka ama qaaddo tallabooyin kale oo keeni kara in wax soo saarkaasi la joojiyo iyadoo aan loo eegin cidda iska leh.

2. Ruqsadda soo saarka waa la xadayn karaa ama la joojin karaa muddo iyadoo danguud loo eegayo xaaladahan soo socda awgood:-

b) Biyo yaraan xoog leh oo ku timaadda kaydka biyaha laga soo saarayo ee ruqsadda soo saaridu khusayso.
t) Marka la xaqiijiyo in codsaduhu adeegsado in ka badan xaddiga biyaha ruqsadda loo siiyay muddo laba sanaddood ah
j) Waxyeello la gaadhsiiyo tayada ama sadhayn loo gaysto kayd biyoodka ruqsada loo qaatay, taas oo dhaafsan heerka la ogolyahay.
x) Soo saaridda oo sabab u noqon karta waxyeelo ku timaada kayd biyoodka sida biyo sadhaysan ama kuwa badda oo soo gala.
kh) Khatari ku timaado degaanka oo keeni karta nabaad guur, iyo dadka iyo xoolaha oo meel ku urura.

3. Waa in ay jirto magdhow u dhiganta oo laga bixiyo xadidaada ama joojinta noocaasi ah haddii aanu haystaha ruqsaddu eeda lahayn iyadoo xaddigeeda

lagu go'aamin doono xeer hoosaadyada ay soo saarto Wasaaradda awooda u leh.

4. Haddii ay dhacdo in ruqsad haystuhu adeegsan waayo muddo Shan sanno ah oo isku xigta, Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha way kala noqon kartaa ruqsadda iyadoo aan wax magdhow ah bixineyn.

5. Haddii ay jirto xaaladda qodobkan faqradiisa 2aad xarafka T iyo faqrada.4aad Wasaaraddu waxay awood u leedahay in xuquuqda biyaha mar kale la siin karo codsadayaal cusub iyadoo la waafajinayo xeer hoosaadka.

## CTUBKA 5AAD
## FULINTA & LAHAANSHAHA

### Qodobka 17aad
### Lahaanshaha iyo adeegsiga guud ee Biyaha

1. Lama Wareejin karo Lahaanshaha khayraadka dabiiciga ah ee biyaha.

2. Dhamaan agabka biyaha ee lagu maalgeliyey hantida dawladdu waa hanti qaran oo dawladdu ka masuul tahay.

### Qodobka 18aad
### U dhiibista adeega danta guud

1. Dawladda Dhexe waxay ugu dhiibi kartaa xuquuqda adeegsiga khayraadka biyaha Dawladda Hoose ka dib marka ay heshiis labada dhinac wada galaan.

2. Heshiisku waa in uu si buuxda ugu wareejiyaa dawladda hoose ee uu khusayeeyo fidinta adeega biyaha iyo xuquuqda adeegsiga agabka.

3. Haddii aanu ka hor imanayn nuxurka qodobkan faqradiisa 1aad iyo faqradiisa 2aad Dawladda Hoose awood uma laha in ay hantidda Dawladda Dhexe ee lagu aaminay iibiso, cid kale ku wareejiso ama heshiis maamul wadaag ah kula gasho cid saddexaad.

## **Qodobka 19aad**
## **Dib-ula-soo Noqoshada Xuquuqda Addeegsiga ee Dowladda Dhexe**

**1.** Haddii Adeeg bixiyuhu ku guuldaraysataan xaqiijinta habsami u fidinta adeegga biyaha, taas oo curyaaminaysa fidinta adeegyada biyaha, dawlada dhexe waxay awood u leedahay dib ula soo noqoshada xuquuqda adeegsiga hantida qaranka.

**2.** Marka dawladda Dhexe dib ula soo noqoto xuquuqda adeegsiga hantida, dawlada dhexe waa in ay sii waddaysaa masuuliyada buuxinta adeegyada biyaha ee degaanka ay khusayso.

**3.** Wassirka wasaaradda khayraadka biyaha ayaa leh awoodda magacaabista iyo xilka qaadista maareeyayaasha iyo maareeye ku xigeenada wakaaladaha (adeeg bixiyaha dawliga ah)

## **Qodobka 20aad**
## **Xaqa adeegsiga Agabka Biyaha**

1. Xaqa adeegsiga Agabka biyaha danta guud loo isticmaalo waxay waajibinaysaa masuuliyada in la xaqiijiyo joogtaynta maaraynta adeegyada ku saabsan:-

B. In si fiican loo abaabulo habsami u hawlgelinta iyo dayactirka agabka adeegsiga biyaha

T. In la abaabulo maalgalin lagu cusboonaysiiyo agabka adeegsiga khayraadka biyaha iyadoo lagu qorshaynayo muddada jiritaanka [cimriga] laga filayo qaybaha kala duwan.

j. In la qorsheeyo fidinta iyadoo lagu jaangoynayo baahida.

**Qodobka 21aad**
**Maalgelinta Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee Agabka Dadweynaha**

1. Maalgalinta ay ku sameeyaan hay'adaha aan dawliga ahayni agabka biyaha ee loogu talagalay adeegga dadweynaha waa in ogolaansho loo helo sida uu dhigayo qodobka 15aad.

2. Agabka lagu horumariyey qodobkan faqradiisa 1aad waa in marka uu dhamaado lagu daro hantida qaranka iyo diiwaanka hantida iyadoo loo cuskanayo heerbeegyada qodobka 15aad.

3. Iyadoo la racayo qodobkan faqradiisa 2aad hay'adda maalgalintu waa inay agabka biyaha ku wareejisaa heerka ugu hooseeya ee maamulka awoodi kara inuu buuxiyo xaqa adeegsiga xuquuqda biyaha ee uu dhigayo qodobkan faqradiisa.1aad iyadoo la raacayo hab-nidaameedka wasaaradda u xilsaaran arimaha biyuhu u diyaarisay.

4. Marka adeegga biyuhu dhamaantii ku yaalo xuduudda degmo keliya, heerka ugu hooseeya ee ku haboon adeegsiga xuquuqdu waa degmada.

5. Marka adeega biyuhu ku yaalo xuduudaha degmooyin kala duwan heerka ugu haboon adeegsiga xuquuqda waa gobolka.

**Qodobka 22aad**
**Maalgalinta Degmooyinka ee Agabka Dawladdda**

1. Maalgalinta degmooyinku ku sameeyaan agabka wax soosaarka loogu tallogalay biyosiinta dadweynaha waa in lagu bixiyo ruqsad sida uu dhigayo qodobka 15aad.

2. Agabka biyaha ee degmadu ku maalgalisay hantida qaranka waxa iska leh degmadaasi marka uu dhamaado, lagumana dabaqayo hab-nidaamyada xil wareejinta, magdhowna ma leh.

**Qodobka 23aad**
**Maalgalinta Dawladda Dhexe ee Agabka Qaranka**

1. Maalgalinta dawladda dhexe waa inay la jaanqaadayso qorshaha baahida degmada iyo kala mudnaanta horumarinta ee heerka degaan.

2. Agabka lagu horumariyay qodobkan faqradiisa 1aad waa in lagu daro diiwaanka hantida qaranka loona dhiibo heerka maamul ee ugu hooseeya ee awoodi kara hawl galinta xuquuqda adeegsiga iyo masuuliyadda uu qeexayo qodobka 20aad.

3. Heerka ugu haboon ee ugu hooseeya xuquuqda adeegsiga agabka nidaamka biyuhu waa degmada.

**Qodobka 24aad**
**Maalgalinta Hay'adaha gaarka ee Agabkii hore ee Dawlada**

1. Marka dadka gaarka ahi maalgaliyaan adeeg dawladdu leedahay iyadoo ujeedadu tahay balaadhinta ama dib u cusboonaynta adeegaas, heshiiska maalgelintaas lagu sameeyay waa inuu tilmaamo sida agabkaasi loogu darayo hantida guud sida:-
b. Taariikhda lagu heshiiyay.
t. Shuruucda loo adeegsanayo qiimaynta dib ula soo noqoshada maalgelinta gaarka ah.
j. Dariiqooyinka loo magdhabayo waxyaabaha ku luma lahaanshaha gaarka ah.

2. Maalgalinta ay dadka gaarka ahi ku sameeyaan adeegga biyaha dadweynaha waxa loo kala saari karaa heerarkan soo socda:-

b. Heerka 1aad: - Hawlgallada, dayactirka iyo bedelidda qaybaha nidaamku u baahan yahay si uu ugu socdo heer la mid ah kii hore
t. Heerka 2aad: - Hawlgallada, dayactirka, bedelida iyo ballaadhinta nidaamka si loo horumariyo hawlgallada adeega.
j. Kharashyada heerka 2aad oo keliya ayaa loo aqoonsanayaa maalgalin mutaysata magdhow sida ku xusan qodobka 24aad faqrdiisa 3aa

## Qodobka 25aad
## Maalgalinta Hay'addaha gaarka ah

1. Maalgalinta ay Hay'adaha gaarka ahi ku sameeyaan nidaamyada biyaha cusub ee loogu talogalay dadweynaha, waa in lagu dabaqo xeer-hoosaadyada wasaarada awoodda u lehi diyaarisey.

2. Agabka biyaha ee dhamaantood ay maalgeliyeen qof ama qaar ka mid ah maalgaliyayaasha gaarka ah waxa yeelanaya maalgaliyaha xitaa haddii agabkaasi loo adeegsanayo biyo siinta dadweynaha.

3. Haddii ay dhacdo in lagala wareego si loogu daro nidaamka agabka danta guud, waa in la siiyo magdhow hay'adda gaarka ah, magdhowgaasi waxa lagu dabaqayaa habka qiimo-dhaca [depreciation] ee loo adeegsado shaqooyinka biyaha ee caalamiga ah haddii aanay Wasaaradda awoodda u lihi dejin nidaam kale oo ku haboon.

# CUTUBKA 6AAD
# BIYA SIINTA MAGAALOOYINKA

## Qodobka 26aad
## Qeexidda Aagagga Magaalooyinka

Goobaha Magaalooyinku waa degmooyinka darajada 'A' marka la eego xeerka gobollada iyo degmooyinka (xeer lam 23/2002) taariikhdii uu soo baxay xeerku

degmooyinka darajadda ‘A’ waxay ahaayeen Hargeysa, Gebilay, Burco, Ceerigaabo, Laascaanood, Berbera iyo Boorama.

**Qodobka 27aad**
**Degmooyinka iyo Guddiyada biyo siinta Magaalooyinka**

1. Masuuliyada abaabulka iyo kormeerka habsami-u-qaybinta adeegyada biyaha ee goobaha cayiman waxa wasaaraddu u igmanaysaa hay’adda awooda u leh ee degaankaas.

2. Haya’dda degaanka ee awooda loo siiyey biyo qaybinta magaaladu waa degmada.

3. Marka ujeedadu tahay kor ka ilaalinta adeegga biyaha iyo heshiiska shaqo, guddiga madaxa bannaan ee biyaha waa in ay ku jiraan xubno ka wakiil ah macaamiisha [isticmaalayaasha] kala duwan kuwaas oo ay soo magacowday Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyuhu.

**Qodobka 28aad**
**Hawlgalinta Biyo siinta Magaalooyinka**

1. Si ay u fuliso masuuliyadda ku qeexan qodobka 27aad faqradiisa 2aad, degmadu waa inay u igmato hawlgalinta iyo maaraynta adeegga biyaha cidda ku habboon halkan wixii ka dambeeya la odhan doono biyo-siiyaha.
2. Biyo-siiyuhu wuxu noqon karaa: -

b. Wakaalada Biyaha Dawladda oo madax banaan oo heer degaan ah (xisaabaadkeeduna gaar u yahay).
t. Wakaalada Biyaha Dawladda oo madax banaan oo heer qaran ah (xisaabaadkeedu u gaar yahay).
j. Biyo-siiye gaar ah oo madaxbanaan (shakhsi, shirkad yar ama shirkad weyn oo gaar loo leeyahay ama la wada leeyahay sida ppp)

3. Heshiiska hawgalku waa:-

B. Aaga laga rabo biyo siiyuhu in uu gaadhsiiyo adeegiisa

T. Heerarka kala duwan ee adeegga biyo-siiyuhu ku ballanqaaday inuu u fidiyo macaamiishiisa.

J. Heerbeegyada (standards) farsamo ee ay tahay in uu biyo-siiyuhu raaco marka uu fulinayo hawlaha (dayactirka, dib-u-hagaajinta iyo horumarinta) nidaamka marka lagu daro saldhigga biyo-soo-saaridda iyo guryo gelintaba.

X. Tacriifta loo ogolaaday inuu biyo-siiyuhu adeegiisa ku iibiyo iyo shuruucda lagu dejinayo sicirkaas muddada heshiishka.

Kh. Ujuuradda heshiiska ee ay tahay inuu biyo-siiyuhu siiyo hay’adda awooda loo siiyey oo ah magdhowga adeegsiga agabka qaranka.

D. Kharashka looga baahanyahay inuu biyo-siiyuhu siiyo Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha oo ah ujuurooyinka biyo-soo-saarka iyo adeegsiga khayraadka biyaha.

R. Tirokoobka agabka hantida qaranka ee biyo-siiyaha lagu wareejiyay, tafaasiisha laga bixinayo qiimahooda maalinta heshiiska la saxeexo iyo habka lagu xisaabinayo qiimodhaca [Depreciation] qalabka muddada la adeegsanayo.

S. Waxyaalaha looga baahanyahay si loo horumariyo xisaabtanka iyo madmadaw la’aanta, taas oo ah inuu biyo-siiyuhu u soo gudbiyo Wasaarada, Degmada iyo Guddiga Biyaha warbixinta shaqada iyo dhaqaalaha si dabagal loogu sameeyo habsami u fulinta shaqada.

Sh. Heerbeegyada shaqo-wanaaga ee looga baahanyahay in uu buuxiyo biyo-siiyuhu markuu adeegga bixinayo.

Dh. Faahfaahinta shaqooyinka iyo maalgalinta laga rabo in uu fuliyo biyo-siiyuhu.

C. Faahfaahinta shaqada iyo maalgalinta laga rabo inay fuliso cidda leh xuquuqda adeegsiga. G. Muddada heshiiska iyo shuruudaha cusboonaysiinta.

F. Shuruudaha uu heshiiska ku burin karo mid ka mid ah saddexda dhinac

Q. Nuqul ka mid ah Heshiiska shaqada waa in la siiyo hay'adda awooda u leh si loo diiwaangeliyo sidoo kalena waa in nuqul kaas la mid ah la siiyo guddiga biyaha meeshii ay ka jirto.
K. Haddii is afgaranwaa ku saabsan qeexidda qodobbada heshiisku dhexmaro degmada iyo biyo-siiyaha, waa inay guddiga biyaha ee madaxabanaan dhexdhexaadiyaan degmada iyo biyo-siiyaha.

**Qodobka 29aad**
**Maaraynta Dhaqaalaha dib u Cusboonaysiinta Hantida**

1. Biyo-siiye kasta waa inuu ka sameeyo dakhligiisa miisaaniyad loogu talo galo cusboonaysiinta iyo fidinta nidaamka biyaha.

2. Xaddiga miisaaniyadaasi oo lagu cabiray boqolleyda (%) dakhliga waa in lagu qeexo Heshiiska hawgalka. 3. Adeegsiga miisaaniyadaasi waxa lagu salaynaya barnaamij maalgalineed, oo ay sannad walba isku racaan dhinacyada heshiisku.

3. Heshiiska sharciga ah ee ay wada gelayaan degmada iyo biyo-siiyuhu waxaa looga magac dhigayaa 'Heshiis hawgal', wuxuuna qeexayaa wax yaabaha loo xilsaaray biyo-siiyaha waana in ay ogolaadaan oo wada saxeexaan wasaaradda, guddoomiyaha degmada iyo wakiilka biyosiiyaha awoodda loo siiyay.

**Qodobka 30aad**
**Kormeerka Wasaarada ee Biyo-siinta Magaaloyinka**

1. Iyadoo loo igmaday hubinta adeegga biyo qaybinta Wasaaradda u qaabilsan arimaha biyaha ayaa ka masuul ah kormeerka in si buuxda loo fuliyay masuuliyadda ay u igmadeen dagmooyinka.

2. Kormeerka Wasaarada waa inay weheliyaan tilmaamayaashii lagu heshiiyay ee habsami u shaqaynta iyo qiyaaso ka dhexeeya degmooyinka

## CUTUBKA 7AAD
## BIYO-QAYBINTA MIYIGA

### Qodobka 31aad
### Qeexida Aagga Reer guuraaga

Aagga miyiga waxa lagu qeexay degmooyinka lagu qiimeeyay Xeerka Gobalada iyo Degmooyinka ee ay darajadoodu tahay T, J iyo X.

### Qodobka 32aad
### Masuuliyadaha Dawladaha Hoose ee Biyo-qaybinta Miyiga

1. Masuuliyadda abaabulka iyo kormeerka habsami u qaybinta adeega guud ee biyaha ee goobaha la cayimay waxa loo igmaday hay'adda deegaanka ee awooda loo siiyay aagaasi.

2. Hay'adda deegaanka ee awooda loo siiyay waxay masuul ka tahay: -

[

b. Qorshaynta maalgalinta khusaysa biyo qaybinta xuduudahooda iyagoo u samaynaya kala mudnaanta baahida biyaha.

t. Fulinta maalgalinta loo qorsheeyey.

j. Raadinta maalgalinta loo qorsheeyay biyaha.

x. Abaabulida maaraynta adeegga biyaha

### Qodobka 33aad
### Maaraynta Biyo qaybinta Macaamiisha

1. Hay'ada deegaanka ee loo igmaday iyadoo kaashanaysa dhisme dhaqameedka waxay xulan karaan kooxaha macaamiisha biyaha [biyo isticmaalayaasha] iyagoo ku dhiiri galinaya una fududaynaya inay samaystaan ururro u gaar ah macaamiisha biyaha sida ku qeexan qodobka 74aad ee xeerkan.

2. Ururrada macaamiisha biyuhu, iyagoo kaashanaya hay'adda degaanka ee awoodda u leh, waa inay maareeyaan adeegga biyaha dadweynaha si ay isu bixiyaan taas oo ay ku jirto maaraynta maalgalinta kharashka shaqada socota iyo kharashka raasamaalka ahba.

## Qodobka 34aad
## Maaraynta Biyo-siinta gaarka ah

1. Iyadoo la fulinayo masuuliyadda qodobka 32aad faqradiisa 2aad, degmooyinku waxay awood u leeyihiin in ay u igmadaan hawgalinta iyo maaraynta adeegga biyo-siinta hay'addii awoodi karta maamulkeeda taas oo noqon karta mid gaar loo leeyahay.

2. Heshiiska igmashadaasi ee biyo-qaybinta reer guuraaga waxa loo abaabulayaa si la mid ah habka Qodobka 27aad faqradiisa 3aad

## Qodobka 35aad
## Maaraynta Biyo-qaybinta Dadweynaha ee Degmada

1. Hadii ay suurto gali waydo in la doorto kooxda macaamiisha biyaha ama biyo-qaybiye gaar ah ee goob ka mid ah miyiga, degmadu, waa in ay abuurto unugga maaraynta biyaha.

2. Shaqooyinka iyo waajibaadka unugga maaraynta biyaha waxa faafaahin doona xeerhoosaadyada.

## Qodobka 36aad
## Adeegga Gaar ka ah ee Biyaha Miyiga

Biyaha miyiga ee ay dadka gaarka ah leeyihiin waxa maaraynaya dadka leh haddii ay fuliyaan shuruudaha adeegsiga iyo qaybinta biyaha ee lagu tilmaamay xeerkan biyaha.

## CUTUBKA 8AAD
## BIYO SIINTA XOOLAHA

### Qodobka 37aad
### Xuquuqda Ilaha Biyaha Miyiga

1. Ilaha biyaha miyiga waa il-biyood kasta ah oo adeegsigiisa ugu muhiimsan yahay baahida reer miyiga, waraabinta xoolaha iyo adeegsiga bulshada miyiga.

2. Biyaha baabuurta lagu qaado ama hab kale loo qaado laguma dabaqayo qodobbada xeerkan.

1. Xeerkani waxa uu aqoonsanyahay sharciyaynayaa xoojinayaa xeer dhaqmeedyada loo adeegsado biyaha miyiga, marka laga reebo meelaha gaarka loogu tilmaamay xeerkan.

### Qodobka 38aad
### Qorshaynta iyo Sharciyaynta Bar-biyoodyada Cusub ee Xoolaha

1. Wasaaradda ayaa u xilsaaran inay qorshayso, sharciyaysana khayraadka biyaha xoolaha. Wasaaraddu waa inay ka shaqayso horumarinta biyaha xoolaha iyadoo la tashanaysa Wasaaradda Horumarinta reer miyiga iyo degaanka iyo Wasaaradda xanaanadda Xoolaha, si looga hortago xaalufka iyo nabaadguurka.

2. Haddii aanu ka hor-imanayn samaynta xuquuqda ilaha biyaha cusub ee miyiga sida (ceelasha, Riigaga, Barkadaha Ballayada) Wasaaradu waa in ay marka hore codsato oggolaansho qoraal ah oo ay ka hesho Wasaarada Horumarinta Reer Miyiga iyo deegaanka iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha

**Qodobka 39aad**
**Ilaalinta Degaanka Ilaha Biyaha Miyiga**

1. Wasaaradda Horumarinta miyiga iyo degaanka iyagoo la tashanaya wakiilada Wasaaradda Biyaha, xannaanadda xoolaha ee heer degmo waxay cadaynaysaa meelaha ay ilaha biyuhu ku keeni karaan xaaluf iyo nabaad guur.

2. Haddii ay dhacdo xaaladda qodobka faqradiisa 1aad wakiilada heerka degmo ee Wasaaradaha u xil saaran miyiga iyo degaanka, biyaha, beeraha iyo xooluhu waxay tallo ka bixinayaan habkii loo joojin lahaa xaalufka sida joojinta ilaha biyaha cusub ka tashiga kuwii hore iwm..

**Qodobka 40aad**
**U Ogolaanshaha Xoolaha Biyaha Miyiga**

U oggolaanshaha xoolaha goobaha cayiman ee ilaha biyaha miyiga waxa lagu dhaqayaa xeerar dhaqameedyada. Xeerkan wuxuu u tixgalinayaa odayaal dhaqmeedku inay yihiin kuwa ku haboon nidaaminta u ogolaanshaha xoolaha ilaha biyaha miyiga

**Qodobka 41aad**
**Xallinta Khilaafaadka Biyaha Miyiga**

1. Haddii khilaaf ka yimaado adeegsiga ilaha biyaha miyiga, waxa lagu xalinayaa khilaafkaasi xeer-dhaqameedka biyaha ee degaankaasi.
2. Haddii heshiis laga gaadhi waayo khilaafka, waxa loo gudbinaya Maxkamada awooda u leh.

**CUTUBKA 9AAD**
**BIYAHA BEERAHA**

**Qodobka 42aad**
**Xuquuqda Biyaha Beeraha**

1. Ilaha Biyo waraabinta beeruhu waa nooc kasta oo il biyood ah oo adeegsigiisa ugu muhiimsani yahay

waraabinta beeraha iyo jardiinooyinka oo leh ujeedooyin ka badan heerarka quudashada.

2. Xeerkan wuxu aqoonsan yahay, sharciyaynayaa, xoojinayaa, tixgalinayaa, xeer dhaqameedyada loo adeegsado xallinta khilaafaadka ku saabsan biyaha Waraabka beeraha, marka laga reebo meelaha sida gaarka ah loogu tilmaamay xeerkan.

3. Haddii iyo meeshii biyo yaraan culus timaaddo, ama ay suura gal noqonweydo in biyuhu u qaybsamaan, mudnaanta biyo-siinta dadka, xoolaha iyo beeruhu waxay u kala horraynaysaa sidan:

1. *Mudnaanta 1aad dadka*
2. *Mudnaanta 2aad xoolaha,*
3. *Mudnaanta 3aad beeraha*

## **Qodobka 43aad**
## **Sharciyaynta iyo Qorshaynta Biyaha Beeraha ee Cusub**

1. Wasaaradda ayaa u xilsaaran qorshaynta iyo sharciyaynta biyaha loogu baahanyahay horumarinta waraabka beeraha, iyadoo la tashanaysa Wasaaradda Beeraha iyo Wasaaradda Horumarinta Reermiyiga iyo Deegaanka.
2. Haddii aanu ka hor imanayn samaynta xuquuqda biyaha cusub ee waraabinta beeraha sida: Ceel-gacmeed, Riig, Barkad, Balli, War, Gacan, iwm waxay u baahan yihiin ku qanacsanaanta madaxda bulshada ee degaanka laga samaynayo.

# **CUTUBKA 10AAD**
# **HEERKA TAYADA BIYAHA LA CABO**

## **Qodobka 44aad**
## **Doorka tayada biyaha**

1. Wasaaradda Caafimaadku waa hay’adda awoodda u leh qeexidda heer-beegyada laga rabo fayadhawrka

agagaarka ilaha biyaha la cabo iyo fayo-dhawrka shakhsiga ah.

2. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyuhu waa inay qeexdo soona saarto heer-beegyada tayada biyaha la cabo, nidaamka loo kormeero, dariiqooyinka loo shaybaadho iyo diwaangalinta shaybaadhada biyaha ee la oggolaaday (certified laboratory).

3. Degmooyinku waa inay hirgaliyaan barnaamijyada ilaalinta tayada biyaha iyagoo raacaya sida ku qoran heshiiska hawlgalinta sida ku tilmaaman qodobka 28aad faqradiisa 3aad ee xeerkan.

## Qodobka 45aad
## Masuuliyadaha Degmada ee dhinaca Tayada Biyaha

1. Shaybaadka dhexe ee Wasaaradda iyo kuwa Gobolada/ Degmadmooyinka ayaa ka masuul ah ilaalinta iyo xaqiijinta tayadda biyaha la cabo, kuwa loo istcmaalo adeegsiyada kale kuwa iyo biyaha la warshadeeyo waana inay buuxuyaan shuruudaha caalamaga ah (WHO) iyo kuwa dalkaba.

B. Waa in la ciqaabo cidda qaybisa biyo tayoodudu aanay ku haboonayn adeegsiyada kala duwan waxa dhibaatada ka timaadda qaadaya cidda adeegaa bixisay.

T. Wasaaraaddu waa inay diiwaan galiso warshadaha biyaha si joogta ahna u ansixiyo tayadooda.

J. Wasaaraddu iyo laamaha xidhiidhaa waa inay kor u qaadaan aqoonta dhinaca tayada ee hawlwadenada biyaha

2. Tayada biyaha la qaybiyey hadday khilaafsanyihiin heerka qaranka loo dejiyay, degmaddu waa inay ku amarto biyo-qaybiyaha in uu joojiyo adeegga ilaa inta laga helayo heerkii tayada biyaha qaran ee la oggolaa.

3. Haddii aanay ka horimanayn qodobkan faqradiisa 2aad degmadu iyadoo la tashnaysa wasaaradda Caafimaadka ee awooda u leh marka ay timaado duruuf aad u adag waxay u ogolaanaysaa biyo-qaybiyaha in uu

sii wado qaybinta biyaha aanay tayadoodu wanaagsanayn haddii ay jiraan xaaladahan: -

B. In aan la heli karin il-biyood kale oo ka tayo wanaagsan.

T. In ogolaanshuhu yahay muddo kooban.

J. In macaamiishu ka warqabaan khatarta caafimaad, lana qaadayo taxadirkii lagaga hortegi lahaa.

X. Marka uu dhamaado waqtigii loo ogolaaday degmadu waa in ay hubiso tayada biyaha, una ogolaato hadii tayadu noqoto heerkii laga doonayay.

**Qodobka 46aad**
**Masuuliyadda Biyo-qaybiyaha Dhinaca Tayada Biyaha**

1. Masuuliyadda biyo-qaybiyuhu waa hubinta tayada biyaha la cabo iyo kuwa lagu diyaarinayo cuntada iyo cabitaanka in ay waafaqsanyihiin heer-beegyadda tayada biyaha ee lagu qeexay Qodobka 44aad faqradiisa 1aad.

2. Adeegga biyo siiyuhu u qaybiyo dadwaynaha waa in ay tayadoodu waafaqsan tahay heerbeegyada qaranka tayada biyaha la cabo.

[

3. Biyo-qaybiyuhu waa inuu bixiyo Dhammaan kharashka baadhista tayada biyaha.

4. Haddii aanu ka horimanayn qodobkan faqradiisa 1aad oo ay dhacdo xaaladda ku xusan qodobka 45aad faqradiisa 3aad biyo siiyuhu waa inuu ku xalliyo dhibaatooyinka tayada biyaha ku yimaadda muddo macquul ah gudaheed, muddadaas oo ay u qabanayso Wasaarada Caafimaadku.

5. Haddii ay dhacdo xaaladda qodobka 45aad faqradiisa 2aad, macaamiisha ay saamayso dhibaatada tayada biyaha ay cabeen waxay xaq u

leeyihiin in biyo qaybiyuhu siiyo magdhow taasoo ay cadaynasyo Maxkamada Awooda u leh.

## CUTUBKA 11AAD
## LAALINTA BIYAHA DHULKA HOOSE

### Qodobka 47aad
### Mudnaan iyo Sharaxaad

1. Adeegsiga biyaha dhulka hoose waa in lagu ogolaado nuxurada Cutubkan, xeerarka iyo xeer hoosaadyada kale ee ku haboon.
2. Biyaha dhulka hoose macnaheedu waa soo saaridda biyaha, hawlaha dhismaha, hawgalinta iyo rakibaadda qalabka la xidhiidha biyo soo saarka, biyaha dhulka hoose galaya, maaxda iyo fal kasta oo saamyan ku leh qulqulka biyaha dhulka hoostiisa iyo tayadiisa.
3. Shaqooyinka biyaha hoose ama qalabka waxa loola jeedaa rakibaad loo adeegsanayo biyosoo-saaridda biyaha dhulka hoose, sida ceelgaaban, ceel riig ah, kanaal, durdur isku talaalan, qodis kasta oo loola jeedo qalabka wax soo saarka, rakibaadooda iyo wixii dhismo ah.

### Qodobka 48aad
### Hay'da, Awooda u leh Ilaalinta Biyaha

1. Wasaaradda khayraadka Biyaha ayaa ah cidda u xilsaaran biyaha, hase yeeshee tani Kama horistaagayso Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale in ay awoodda maamulka biyaha dhulka hoose wax ku yeeshaan, hadii ay wasaaradu u igmato si waafaqsan xeerkan iyo xeer-hoosaadyada biyaha.
2. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyuhu waa haya'dda awoodda u leh dhinaca ururinta, baadhista, tirokoobka, raadraaca cilmiga dhulka iyo biyaha, sahanka shaqooyinka biyaha dhulka hoose iyo habsami u fulinta shaqooyinkaas.

## Qodobka 49aad
## Ruqsadaha iyo Macluumaadka

1. Ruqsadaha biyo soo saarka waa in lagu muujiyo xaddiga ugu badan biyo-soo-saarka sannadkii iyadoo warbixinta loo keenayo wasaaradda.

2. Cid kasta oo adeegsanaysa biyaha dhulka hoose waxa looga baahanyahay inay sharci ahaan siiyaan macluumaadka farsamo ee cusub iyo kuwii horeba hay’adda loo igmaday.

## Qodobka 50aad
## Sahaminta Cilmiga Dhulka iyo Biyaha dhulka hoose

1. Wasaaraddu waa inay bixiso ruqsadda sahaminta cilmiga dhulka ama shaqooyinka ka faa’idaysiga khayraadka biyaha hoose, waa inay hubisaa in la ilaaliyay nuxurka xeerkan khuseeya dhawrida khayraadka biyaha, tayadooda iyo in si joogto ah loo siiyey macluumaadka iyo tirokoobka.

2. Qofkasta oo la kulma biyaha dhulka hoose marka uu sahanka ku jiro ama uu qabanayo shaqooyinka oogada dhulka, waa in aanu wax yeello u gaysan khayraadka biyaha.

3. Qofkasta oo fulinaya hawlaha sahanka ama qodista biyaha dhulka hoose, shidaal, macdan ama shaqo kale ka fulinaya dhulka hoostiisa isagoo ujeeddo ka leh, waa inuu si degdeg ah ugu wargaliyaa hay’adda loo igmaday marka uu la kulmo biyaha dhulka hoose iyo macluumaadka kaleba inta shaqooyinku socodaan.

## Qodobka 51aad
## Maaxda iyo ku shubista Biyaha Dhulka Hoose

1. Waxa mamnuuc ah in wax lagu shubo biyaha dhulka hoose iyo maaxdoodaba marka laga reebo barnaamijyada maaxinta aan dabeeciga ahayn (artificial recharge) ee

meelaha ay soo wajahday biyo yaraantu. Marka ay xaaladaasi jirto waa in Wasaaraddu si adag uga ilaaliso khayraadka biyaha dhulka hoostiisa sadhow iyo burbur ku yimaada.

**<u>Qodobka 52aad</u>**
**<u>Ilaalinta Aagaga Ceelasha Riiga ah</u>**

1. Aaga u dhow ceelasha riigga ee loo adeegsado ujeedooyinka cabista waa in la cadeeyaa in ay tahay aag la ilaaliyay (protected area) sida ay dhigayaan nuxuradda Xeerka Biyaha iyo xeerhoosaadyada kale.
2. Habaynta, naqshadda, iyo xuduudaha aaga la ilaaliyay iyo shaqooyinka la xadiday ama laga mamnuucay aagga waxa qeexi doona xeer-hoosaadyada.

**<u>Qodobka 53aad</u>**
**<u>Xeer-hoosaadyada khuseeya Qodista.</u>**

1. Wasaaraddu waa in ay soo saarto xeer-hoosaadyo khuseeya shaqooyinka lagaga soo saarayo biyaha dhulka hoostiisa, hubisaasna awooda cida ay siinayso qandaraasyada riigagga.

**<u>Qodobka 54aad</u>**
**<u>Kormeerka Khayraada Biyaha Dhulka Hoostiisa</u>**

1. Waa in la joogteeyo tiro koobka agabka khayraadka biyaha iyo adeegsigooda, ururinta macluumaadka iyo cilmibaadhisyada lagu sameeyo. Dadka dhulka leh iyo macaamiisha biyuhu waa inay u fududeeyaan una soo gudbiyaan wasaaradda macluumaadka iyo tirokoobka ay ka ururiyeen cilmiga biyaha iyo saadaasha hawada sida xeerku dhigayo.

2. Wasaaradda u qaabilsan arrimaha biyaha waa hay'adda awooda u leh hirgalinta iyo maaraynta tirokoobyada.

**CUTUBKA 12 AAD**
**ILAALINTA BIYAHA OOGADA**

## Qodobka 55aad
## Mudnaan iyo Qeexitaan

1. Adeegsiga biyaha oogada sare waa in si gaar ah loogu dhaqo nuxurada cutubkan, xeerarka iyo xeer-hoosaadyadda Somaliland marka lagu daro kuwa khuseeya waraabka.

2. Adeegsiga biyaha oogada ee lagu xusay cutubkan waxa ka mid ah biyo-ka-soo-saarka, xidhidda, ku shubista iyo ka weecinta biyaha oogada, moosaska la dhigo, shaqooyinka biyaha oogada, agabka, dhismayaasha agabka biyaha, dhoobo qaadka kanaalada iyo harooyinka (marka lagu daro weelalka kaydsiga).

## Qodobka 56aad
## Hay’adda ama Hay’adaha Awooda u Leh

1. Wasaaradda Macadanta iyo Biyahu waa hay’dda awooda u leh nuxurka cutubkan ee khuseeya biyaha oogada dabiiciga ah, marka lagu daro biyaha waraabka beeraha.

1. Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa hay’adaha wada shaqaynta la leh, waa inay soo saarto xeerhoosaadyo khuseeya nuxurka cutubkan biyaha oogada, kuwaasoo sheegaya habka maamulka iyo tafaasiisha sida loo fulinayo.

## Qodobka 57aad
## Adeegsiga Caaddiga ah ee Biyaha Oogada iyo Xadayntiisa

1. Wax ruqsad ah loogama baahna adeegsiga ilaha biyaha oogada dabeeciga ah, marka laga reebo biyo soo saarka mashiinada iyo u adeegsiga danta guud.

2. Xoolaha nooli waxay xaq u leeyihiin cabitaanka biyaha oogada taasoo waajibinaysa inay si aan waxyeello lahayn u soo dhexmaraan dhulka dadka kale iyadoo aan laga qaadin wax lacag ah ama laga horjoogsan.

**Qodobka 58aad**

**Hawlaha Horumarinta Biyaha Oogada.**

1. Hay'adda awooda u leh waa in ay cadaysaa shaqooyinka nidaamyada biyo kaydinta iyadoo si gaar ah u sheegaysa xaddiga ugu badan iyo Kan ugu yar ee biyaha la siidaynayo, jadwalka iyo waqtiga la siidaynayo, biyaha loogu talo galay in la leexiyo. Xadiga ugu yar iyo faafaahinta maaraynta kaydka waxa la cayimayaa marka la codsado iyadoo la ilaalinayo xuquuqaha dadka gaarka ah.

2. Marka ay caddaato inay lagama maarmaan u tahay danta bulshada, waxaa jiri karta in lala wareego dhulka iyo xuquuqda biyaha gaarka loo leeyahay si loo sameeyo hawlo adeeg biyo oo dan guud ah.

3. Waa in magdhawo ku fulin la siiyo ciddii ruqsadda loo siiyay xuquuqda biyaha lala wareegay, waxaana xadka magdhawgaasi isla oggolaanaya wasaaradda iyo cid dhexdhexaad ah oo takhasus u leh qiimaynta hantida.

4. Haddii cidda lagala wareegey dhulka iyo xuquuqda biyaha gaarka ah ku qanci weydo la wareegidda, habka loogala wareegey ama magdhawga waxay dacwad ka furan kartaa maxkamadda awoodda u leh iyadoo lagu dhaqmi doono xukunka Kama dambaysta ah.

**Qodobka 59aad**

**Adeegsiga Kaydka Biyaha Oogada**

1. Mulkiilaha Agabka biyo kaydintu waa inuu joogteeyo hawlgalinta iyo adeegsiga haddii uu oggolaansho ka haysta haya'dda awooda u leh.

2. Ogolaanshaha lama siinayo haddii la isku raaco in adeegsiga biyaha la soo codsaday ka hor imanayo nuxurka xeerka.

3. Guddiga biyaha ee degmada ayaa qeexaya, iyagoo la tashanaya Wasaaradda loo igmaday, qiyaasaha farsamo ee ay tahay in la qaado si loo ilaaliyo xuquuqda dadyawga ay si waxyeelo leh u saamaynayso yaraynta, leexinta ama joojinta biyaha socda ee la moosay.

4. Haddii ay bulshadu heli Kari weydo xal farsamo oo lagu dhammeeyo khilaafka ka dhasha saamaynta ku xusan qodobkan faqradiisa 3aad waxaa loo gudbinayaa maxkamada awooda u leh si ay go'aan uga gaadho khilaafka iyo magdhawga la siinayo isticmaalayaasha saamayntu wax yeeshay.

5. Qof kasta oo codsada ruqsadda biyo soo saaridda ilaha biyaha oogadda dhulka waa inuu bixiyo macluumaadka iyo tiro koobka loo baahan yahay sida ku cad qodobka 15aad, xeerhoosaadka iyo shuruucda.

6. Si ahmiyad loo siiyo codsiga ruqsadda, wasaaraddu waxay u baahan tahay daraasadda dhaqaalaha iyo ta saamaynta degaanka.

## Qodobka 60aad
## Xuquuqda Macaamiisha biyo-shubka hoose

1. Marka la siinayo ruqsad biyo-soo-saarid dadka gaarka ah ee horumarinaya agabka biyaha waa in la ilaaliyo xuquuqda macaamiisha biyo-shubka hoose.

2. Ruqsadda waa in aan la siin dadka gaarka ah ee horumarinaya shaqooyinka biyaha haddii bixintaasi waxyeello u keenayso xuquuqda macaamiisha biyaha ee biyo-shubka hoose.

3. Dhamaan macaamiisha biyaha oogada dhulku waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah, ha ahaadeen biyo-shubka sare ama Kan hoose. Macaamiisha biyo-shubka sare Kama xidhan karaan biyaha dabeeciga ugu socda meelaha joogoodu hooseeyo, biyaha u soo rogmada ee roobka iyo wixii dheeraad ku ah xaddiga loo ogolyahay ee ruqsadda soosaaridda ku tilmaaman.

4. Haddii aanu ka horimanayn qodobkan faqradiisa 3aad macaamiisha biyo-shubka sare laguma qabsan karo dhibaato ka timid ciid fadhiisatay iyo wax kasta oo hakiya socodka biyaha dabeeciga ah oo aanay iyagu ku lug lahayn.

## Qodobka 61aad
## Ku-shubis Wasakh

1. Ku-shubista biyaha wasakhda ah iyo dareerayaasha kale oo loogu shubo biyaha oogada si toos ah ama si dadban waxay u baahan tahay in ogolaansho loo qaato. Wasaaraddu waa inay samayso xeer-hoosaad khuseeya xadiga iyo reebnaanta ugu badan ee walxaha ku shubistoodu aanay dhib u keenayn biyaha oogada.

2. Wax ku shubis ah lama oggola haddii ay isbedel duleed, kimikaad, bayooloji, Ur, kaahfalid ama bakteeriya ah ku keenayaan biyaha oogada, taas oo dhibaato ku keeni karta dadka, xoolaha iyo degaankaba.

3. Waa in loo dejiyo xeer-hoosaad u gaar ah ku-shubista wasakhda biyaha socda iyo meelaha lagu kaydiyo ee mar walba la buuxinayo.

4. Heshiis kasta oo ay galaan dad gaar ah oo ku saabsan ku shubista biyaha socda wuxuu noqonayaa sharci darro haddii uu ka horimanayo qodobada xeerkan.

**Qodobka 62aad**
**Dhigista Adkayaasha**

1. Ma bannaana in la dul dhigo biyaha oogada ama agagaarkooda qalalan walxo adke ah oo dhalin kara sadhow, isbedel ku keeni kara heerka biyaha, is hortaaga socodka iyo qaybinta biyaha ama ku keeni kara khatar kale biyaha iyo macaamiisha.

2. Wax dhismo ah oo aan la xidhiidhin shaqooyinka biyaha lagama dhisi karo lagumana taagi karo biyo mareenada qalalan dhexdooda iyo meelaha dadku u soo maro, kuwaas oo is hortaagi kara socodka biyaha dabeeciga ah, haddii aan wax ruqsad ah laga haysan wasaaradda.

**Qodobka 63aad**
**Ruqsadda Wax ka soo saaridda Rugaha Biyo-mareenada**

1. Ka soo saaridda alaabta goobaha biyo mareenada ama harooyinka, marka laga reebo dayactirkooda kaas oo bedeli Kara, leexin kara socodka biyaha ama bedeli kara heerka biyaha hoose iyo tayadooda waxay u baahan tahay ogolaashaha wasaaradda.

2. Si loo tixgaliyo codsiyada noocan ah wasaaraddu waxay qiimaynaysaa faa'idooyinka wax soo saarka noocaasi ah, iyadoo lagu xidhiidhinayo qiimaha ay u leeyihiin bulshada iyo saamaynta ay ku yeelanayaan biyaha oogada dhulka iyo degaanka.

3. Wasaaraddu marka ay fulinayso awoodda ku xusan qodobka 64aad, waa in uu codsaduhu ka soo baxo dhammaan shuruudaha farsamo iyo wixii lagama maarmaan u ah ogolaanshaha ruqsadda si looga hortago ama loo yareeyo saamaynta wax yeelada.

# CUTUBKA 13AAD
# UJUUROOYINKA KIRADA IYO SOO SAARISTA

## Qodobka 64aad
## Hay'adda Awooda u leh Ujoorooyinka

1. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyuhu waxay ka masuul tahay in ay dejiso hagayaasha guud ee khuseeya tacriifta biyaha macaamiisha loo fidinayo, xeer-hoosaadyada iyo ogaysiisyada khuseeya ujuurooyinka soo saaridda iyo lacag bixin kasta oo gaar ah.

2. Xeer-hoosaadyadu waa inay cadeeyaan heerarka iyo hab-xafiiseedyada loo fulinayo tacriifta iyo lacag-bixinta, ogaysiintuna waa in ay muujiso sharciga iyo qiimaha loo adeegsanayo dajinta tacriifta iyo lacag-bixinta, waana inay si xiliyaysan ula jaanqaado sicirbararka iyo isbedellada ku yimaadda siyaasadda qiimaynta.

3. Degmadu waa inay hirgeliso shuruucda iyo ogaysiisyada ay soo saartay wasaaradda ay khusayso dejinta tacriifta biyuhu si ay ugu dhaqmaan biyo qaybiyayaasha oo noqon kara dawladda ama dad shacbi ah.

## Qodobka 65aad
## Hababka Tacriifta Biyaha iyo Lacag bixinta gaarka ah

1. Dajinta tacriifta biyaha iyo lacag bixinta gaarka ahi waa ilaalinta adeegsiga biyaha, abuurista dakhliga guud si loo daboolo kharashka adeegga loona horumariyo adeegga iyo ilaalinta xuquuqda bulshada danyarta ah si loo helo caddaalad bulshada dhexdeeda ah.

2. Biyo qaybiyaha waxa looga baahanyahay diwaangelinta tilmaamaha iyo qaabka uu u fuliyay tacriifta iyo lacag-bixinta.

3. Haddii aanu ka horimanayn qodobkan faqradiisa 2aad, tacriifta biyuhu waa inuu daboolo dhamaan kharash sanadeedka wax-soo-saarka, dayactirka iyo horumarinta shaqooyinka nidaamka qaybinta biyaha. Tacriifta biyuhu way ku kala duwanaan kartaa magalooyinka kala duwan. Waa in ay ka wada xaajoodaan wasaaradda, degmada iyo biyo qaybiyuhu iyagoo raacaya hagayaasha ay soo saartay wasaardda u xilsaaran biyuhu.

4. Haddii aanu ka horimanayn qodobkan faqradiisa 3aad, dawladu waa inay ku darto kabista ku haboon si loo fufudeeyo adeega loo fidinyo kooxaha aan awoodin in ay bixiyaan dhamaan sicirka adeega.

5. Si loo ilaaliyo heerka dhaqaale ee adeeg bixiyaha, Dawladda Dhexe ayaa ka masuul ah bixinta kabista iyadoo la raacayo dariiqo kasta oo loo arko inay ku haboon tahay. 6. Shuruucda tacriifta lacag bixintu waa in ay kala saartaa adeegsiga iyo macaamiisha iyadoo loo samaynayo sicir heerarkiisu kala duwan yahay, si loo horumariyo ilaalinta iyo habsami u adeegsiga biyaha, iyadoo la muujinayo dhaqaalaynta biyaha.

## Qodobka 66aad
## Saamaynta Dejinta Tacriifta iyo lacag bixinta

Biyo qaybiyuhu ma bixin karo adeega biyaha iyo adeeg la xidhiidha qaybinta biyaha illaa haddii aanu raacin hagayaasha lacag bixinta iyo tacriifta ay soo saartay wasaaraddu.

## Qodobka 67aad
## Ajuuradda Heshiiska

Iyadoo la raacayo nuxurka qodobkan faqradiisa 3aad biyo-siiyaha haysta Heshiiska hawl galinta nidaamka biyuhu waa inuu siiyo haystaha xuquuqda adeegsiga ujuuro heshiis. Ujuuradda heshiiska waxa ku heshiinaya

labada dhinac iyo Wasaarada Macdanta iyo Biyaha, iyadoo la raacayo hagaayaasha ay dejisay wasaarada u xil saaran arrimaha biyuhu.

1. Haddii haystaha xuquuqdu yahay hay'ad dawladeed, ujuuraddu waa inay daboosho dhamaan kharashyada adeegga marka lagu daro beddelaadda agabka meesha loo baahdo. Qiimaha agabka iyo habka qiimo-dhacu [Depreciation] waa inay qayb ka noqdaan heshiiska, sida uu dhigayo qodobka 28aad faqradiisa 4aad.

2. Biyo qaybiyuhu waa inuu si joogto ah u bixiyo ujuuradda isagoo raacaya shuruucda ku qeexan heshiiska shaqada. Xaddiga ujuurada waa in lagu qiimeeyo xaddiga biyaha laga iibshay macaamiisha.

3. Waxyaabaha ugu muhiimsan ee tacriiftu ka kooban tahay oo ay ka mid tahay xaddiga kiradu waa in sannad walba lagu soo daabaco biilasha macmiisha si macmiishu u wada ogaato.

## Qodobka 68aad
## Ujuuradda soo saarida

1. Qof kasta oo adeegsigiisa biyuhu u baahan yahay ruqsadda soo saarista sida ku xusan qodobka 15aad ee xeerka waxa ku waajib ah in uu bixiyo ujuuradda soo saaridda ee lama huraanka ah.

2. Iyadoo la raacayo heshiiska wakiilashada wasaaradda maaliyada, ujuurada soo saaridda waxa qaadi kara wasaarada u xilsaaran arrimaha biyaha iyagoo adeegsanaya wakiiladda gobollada iyo degmooyinka.

3. Ujeedada ujuurada soo saariddu waa in la maalgeliyo joogtaynta maraynta khayraadka biyaha qaranka, marka lagu daro hagaajinta, dayactirka iyo macluumaadka ceelasha riigaga dawladda iyo

nidaamka horumarineed ee khayraadka biyaha dhulka hoostiisa

4. Qiimaha ujuurada soo saaridda, habaynteeda iyo wixii cashuur dhaaf ah waxaa lagu qeexi doonaa xeer-hoosaadyada Xeerkan Biyaha.

5. Ujuurada soo saaridda waxa lagu salaynayaa xaddiga biyaha laga soo saaray kaydka

6. Waxyaabaha ugu muhiimsan ee tacriiftu ka kooban tahay, oo ay ka mid tahay xaddiga ujuurada soo saaridu, waa in sannad walba lagu daabaco biilasha macaamiisha si macaamiishu u ogaato

**Qodobka 69aad**
**Cashuurta Iibka**

Wasaaradda Maaliyaddu iyadoo la tashanaysa Wasaaradda u xilsaan arimaha biyaha, waa inay ka qaado biyaha la iibiyo ee nidaamka magaalooyinka cashuurta iibka, Ururinta iyo xaddiga cashuurta waxa lagu qeexi doonaa xeer-hoosaadka ku haboon.

**Qodobka 70aad**
**Lacag bixinta gaarka ah**

1. Wasaaradda u xilsaaran arimaha biyaha ayaa goynaysa lacag bixinta gaar ah ee ruqsad haystaha ku xad-gudba sharciga loo siiyay soo saaridda iyo qaybinta biyaha.

2. Qiimaha lacag bixinta gaarka ah waxa lagu qeexi doonaa xeer-hoosaad.

3. Qofku haduu ku qanci waayo go’aanka lacag bixinta gaarka ah wuxuu maxkamadda degmada horteeda ka furan karaa dacwada 60 maalmood gudahood oo ka bilaamaysa maalinta go’aanka loo dhiibo.

4. Diidmadaasi marka la diwaan geliyo waxay jiri karta ilaa inta maxkamadu go'aankeeda ka gaadhayso, mudadaasi wax dambi ah laguma soo oogi karo wax saamayn ahna kuma yeeslanayso ruqsadda haddii aanu ku kicin wax rabsho ah oo uu mutaysan karo ganaax.

5. Waa in la diiwaan galiyo qalabka biyaha, hay'adaha biyaha shirkadaha biyaha, warshadaha biyaha iyo sharaabka iyo dhamaan aqoonyahanadda iyo hawlwadeenada biyaha.

6. Tacriifta gaarka ah ee diwaangalinta iyo rusadaha waxa dejin doona Guddi ka kooban wasaaradda maaliyada iyo wasaaradda biyaha waxaana ansixin doona Golaha Wakiilada Jsl.

**Qodobka 71aad**
**Diidmada Lacag-bixinta.**

Hay'adda awooda u lihi, iyadoo fulinaysa go'aanka lacag-bixinta, waxay fursad siinaysaa qof kasta oo u soo gudbiya soo jeedin isagoo raacaya hab-nidaameedka lagu tilmaamay xeerhoosaadka iyo wargalinta.

## CUTUBKA 14AAD
## KALA CAYIMAADA MASULIYADA HAY'ADAHA

**Qodobka 72aad**
**Wasaarada iyo Hay'adaha**

1. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha waxa loo yaqaanaa Wasaaradda Khayraadka Biyaha

2. Wasaaradda u xilsaaran arrimaha biyaha ayaa ah 'Hay'adda awoodda u leh' sida ku xusan qodobada xeerkan, haddii aanay ka hor imanayn xeerkan wasaaradu waxay u igman kartaa qaar ka mid ah

Wasaaradaha iyo hayadaha shaqo cayiman marka loo baahdo.

3.Shaqooyinka Wasaaradda Biyaha waxa ka mid ah qiimaynta, qorshaynta, xidhiidhinta, samaynta istraateejiyadda siyaasadeed, diyaarinta shuruucda iyo iswaafajinta ujeedoyinka mashaariicda hay'adaha kala duwan iyo maaraynta biyaha dalka.

4.Wasaaradda oo ah hay'adda awoodda u leh waxa awoodeeda iyo masuuuliyadeeda laga soo xiganayaa dastuurka Jumhuuriyadda Somaliland, Xeerkan Biyaha iyo shuruucda kale ee biyaha khuseeya.

5.Wasaaradda biyaha iyo hay'adaha kale ee wada shaqaynta la leh, waxay si wada jir ah isku waafajinayaan masuuliyadaha shaqooyinkooda kala gaarka ah iyo qodobbada Xeerkan Biyaha.

## Qodobka 73aad
## Magacaabida Guddiga Biyaha Qaranka

1. Madaxweynuhu waxa uu magacaabayaa Guddiga Biyaha Qaranka isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha Guddidaas oo ka kooban 9 xubnood oo kala ah:-

b. Hal xubin oo ay soo wakiilatay Wasaaradda Macdanta Iyo Biyaha

t. Hal xubin oo ay soo wakiilatay Wasaaradda Beeruhu.

j. Hal xubin oo ay soo wakiilatay Wasaarada Caafimaadku.

x. Hal xubin oo ay soo wakiilaty Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha iyo Deegaanku.

kh. Hal xubin oo ay soo wakiilatay Wasaaradda Arimaha Guduhu

c. Hal xubin oo ay soo wakiilatay Hay'adda ka hor-tagga Aafooyinka NERAD.

r. Hal xubin oo Golaha Guurtidu soo magacaabay kasoo ah dhaqan yaqaan.

s. Hal xubin oo Golaha Wakiiladdu soo magacaabay kaasoo ah sharci yaqaan.
Sh. Hal xubin oo ka wa tooskiil ah daneeyayaasha ugu waaweyn ee danaha tooska ah ku Leh Biyaha Dalka.
DH. Hal Xubin oo ka socota Wasaaradda degaanka iyo horumainta reer miyiga

2. Ujeedada Guddiga Biyuhu waa inay ansixiyaan Xeer-hoosaadyada hawlaha biyaha, inay fududeeyaan iswaydaarsiga macluumaadka dhexdooda iyo kuwa ka baxsan ee khuseeya biyaha, dhexdhexaadinta is afgaranwaaga ka oogma masuuliyadaha is dhexgalaya, dhiirigalinta, horumarinta iyo wixii la xidhiidha ilaalinta khayraadka biyaha dalka.

3. Abuurista Guddiga Biyuhu waxay hirgalayaan marka qaab dhismeedkooda lagu faafiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland.

4. Guddiga Biyuhu, marka la magacaabo, muddo aan ka badnayn 30 maalmood gudohood waa inay ku yeeshaan fadhigooda koowaad xarunta Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyagoo fadhigooda koowaad ku samaysanaya xeer-hoosaadka Guddiga Biyaha Qaranka

**Qodobka 74aad**
**Ururadda Macaamiisha Biyaha.**

1. Ururada macaamiisha biyaha waxa loola jeedaa qof kasta, koox kasta, wakiilada macaamiisha iyo cid kasta oo danaynaysa maaraynta iyo adeegsiga khayraadka biyaha. 2. Waxa la tixgalinayaa hab-nidaameedka dhaqanka biyaha soo jireenka ahaa ee Somaliland.

2. Unugyada ama aasaaska kooxahaasi waxay noqon karaan dad degaan ah ama reer guuraa, xoolo

dhaqato, beeralay, warshadley, ganacsato ama koox kasta oo codka bulshada ku hadleysa kuwaas oo ah macaamiisha biyaha.

3. Maamulka biyaha dadwaynuhu waa inuu aqoonsadaa macaamiisha biyaha una fududeeyaa saamaynta ay ku leeyihiin maaraynta khayraadka biyaha.

4. Maamulka biyuhu waa inuu diyaariyo, isaga oo la tashanaya wakiilada macaamiisha biyaha heer-beegyada, qaabdhismeedka, waajibaadka iyo Xeer-hoosaadka sharcinimadooda.

## CUTUBKA 15AAD
## MULKIYADAHA LAXIDHIIDHA BIYAHA, XAQUUQDA DIWAAN GALINTAIYO LAHAANSHAHA DHULKA.

### Qodobka 75aad
### Xidhiidhka u dhexeeya Biyaha iyo Dhulka

Xuquuqda dad ama kooxi u leeyihiin dhul uma xalaalaynayso inay yeeshaan xuquuqda khayraadka biyaha ee dushooda, hoostooda ama meelaha agtooda ah midna, haddii aanu xeerkan ka horimanayn, taasi kama joojinayso iyaga ama kooxaha leh xuquuqda habsami u adeegsiga khayraadka biyaha iyadoo la raacayo qodobada xeerkan.

### Qodobka 76aad
### Xayndaabka Ceelasha Riigga ah iyo Xuquuqda gelista iyo Baadhista

1. Hay'adda awooda u leh waa in ay ka soo saarto amar lagu qeexayo xuduudda (xayndaabka) ilaha iyo agabka biyaha ee ay tahay in aan loo soo dhaafi karin. Xayndaabkaasi ujeedadiisu waa in ay noqoto ilaalinta agabka khayraadka biyaha lagu horumarinayo wax soo saarka, gudbinta ama kaydinta biyaha.

2. Xadka iyo ujeedada xayndaabka waa in lagu qeexo xeer-hoosaadka, waana inaanu dhaafin xadka loo qoondeeyay.

3. Lama Oggola in la galo ama la dhexmaro xayndaabka dhulka la ilaaliyay ilaa lagu ogolaado ruqsad waafaqsan xaaladaheeda.

4. Qofka u arka in dhibaato ka soo gaadhayso xayndaabka la cayimay ama hay'adda awoodda u leh u diido sida ku xusan qodobka 15aad waxa uu dacwad ka furan karaa Maxkamadda Awooda u leh.

5. Waxa geli kara xayndaabka sarkaal awood loo siiyay baadhista kormeerida, ilaalinta ilaha biyaha, qiyaasta maaxda biyaha iyo hawlgalo lagu darsayo dhulka, dhirta, xaaladaha kale ee cilmiga biyaha iyo dhulka, isagoo ogaysiin hore siinaya cidda haysata ruqsadda biyo soo saarista ee goobta.

**Qodobka 77aad**
**Samaynta Shaqooyinka Horumarinta Biyaha**

1. Ka dib marka loo raaco xeerarka, xeer-hoosaadyada iyo nidaamka dawladeed ee khuseeya la wareegista dhulka gaarka ah, Sarkaalka awooda loo siiyay, marka uu bixiyo ogaysiiska lagu jideyn doono xeer-hoosaadyada ka farcami doona xeerkan, wuxuu la wareegi karayaa lahaanshaha dhulka gaarka loo leeyahay ama wuxu ka joojin karayaa in la adeegsado, haddii loogu baahdo in laga sameeyo adeeg biyo oo dan guud ah sarkaalkaasi isla ujeedadan, wuu gali karaa dhulkaasi iyo meel kasta, wuu ka saari karaa ama ku qodi karaa riig, ka qaban karaa shaqo kasta oo horumarineed, ka goyn karaa geedo ama sarac kale, si ku filan hirgalinta shaqadaa.

2. Hay'ada awooda u lehi waxay u baahan kartaa in la dumiyo dhisme ama hanti kasta oo maguurto ah oo si

joogto ah loogu bedelayo dhismaha shaqooyinka la ogolaaday ee biyaha kadib marka mulkiilaha ogaysiis hore la siiyay iyadoo loo raacayo xeerarka, xeerhoosaadyada iyo nidaamyada dawladeed ee dhaqangalka ah.

3. Shaqooyinka biyaha ee lagu ogolaaday, ujeedada qodabkan waa in ay lahaadaan natiijada go'aanka maxkamadda oo kama dambays ah. Xafiiska Maxkamada Awooda u leh ee go'aanku khuseeyo ayaa iska leh fulinta go'aanka.

4. Haddii dhismaha ama hantida la dumiyay ay tahay meel lagu nool yahay (la degganyahay) ama rug ganacsi, mulkiilaha laguma fulinayo go'aanka ilaa beddelka meesha lagu noolyahay ama meheradda la siiyo ama magdhow kale oo u dhigma la siiyo.

5. Maxkamadda ayaa go'aaminaysa xaaladda iyo habka magadhowga haddii aanu jirin heshiis ay wada galeen mulkiilaha iyo Ha'yadda awooda u lehi. Mulkiilaha go'aanka la weerigida lagu fulin maayo ilaa ay maxkamaddu caddayso waqtiga fulinta. Haddii ay dhacdo in maxkamaddu go'aamiso in si degdeg ah loo fuliyo go'aanka waa in ay maxkamaddu xusta xaquuqda la wareegidda ee dhakhsahaasi dhalin karo, si fiiro gaar ah loogu yeesho go'aaminta magdhowga.
6. Hay'ada awoodda u lehi, iyadoon ku xadgudbayn xuquuqda magdhawga ee ku xusan xeerkan, waxay si joogto ah u yeelan kartaa ama ay kiro uga qaadan kartaa dhulkaasi inta hawlaha biyaha looga baahan yahay, iyadoo aan wax lacag ah la bixinayn, dulsaar ama xuquuq kale. Dhulka ama kiradda waa in lagu diiwaan galiyaa magaca dawladda, iyadoo lagu salaynayo shahaadada ay bixiso hay'adda awoodda u lehi.

7. Marka sarkaalka awoodda loo siiyay ama qandaraaslihiisu qabanayaan shaqo ku meel gaadh ah, sida qodista ama shaqooyinka la midka ah ee dhulka sida joogtada ah aan loo deganayn ama loo lahayn, hay'adda awooda u lihi sida ugu dhakhso badan oo aan ka yarayn lix bilood ka dib marka shaqadu dhamaato waa inay dhulka sidiisii hore ka dhigtaa, ilaa inta suurto gal ah.

8. Mulkiilaha ama sharci ku deganaha dhulku, ka dib marka digniin qoraal ah uu siiyo hay'adda awooda u leh, wuxuu samayn karaa wax kasta oo loo baahan yahay in la qabto, oo aanay qaban hay'adda awooda u lehi si uu u ilaaliyo xaaladii hore ee dhulka. Mulkiiluhu ama deganuhu waa inuu ka codsado kharashyadii uu galay hay'adda awooda u leh intii shaqada la qabanayay.

**Qodobka 78aad**
**Magdhawyada khuseeya hirgalinta shaqooyinka Biyaha**

1. Arrimaha soo socda waxay mudan yihiin in la magdhabo marka ay la xidhiidhaan hirgalinta shaqooyinka horumarinta biyaha. .

B. Cidda leh lahaanshaha ahna kiraystaha dhulka ee ay sida joogtada ah ugala wareegtey hay'adda awooda u lehi, cid kasta oo dhulka ka bixisay lacag ama ku leh xuquuq kale dhulka ka hor intaan lala wareegin, cid kale oo dhaawac ka soo gaadhay samaynta shaqooyinka biyaha ama naafo iyo jabis ay sababeen shaqooyinka biyuhu, ama qof ay dhibaato ka soo gaadhay ka dib markii laga qaaday xuquuqdii uu lahaa ee uu kaga faa'idaysan lahaa dhulka ama hoos u dhac ku yimid qiimihii dhulkiisa kaasoo ay sababeen shaqooyinka biyaha ee ay amartay hay'adda awoodda u leh. .

T. Hayadda awooda u lehi waa inay soo saarto xeer-hoosaadyo khuseeya arrimaha lagu soo sheegay ama aan lagu soo sheegin xeerkan kuna saabsan samaynta shaqooyinka biyaha oo hanti ama dhul loola wareegayo si joogto ah iyo si ku meelgaadh, magdhowga lacagta ah ama si kale loo bixinayo, habka loo raacayo xisaabinta magdhow iyo xadidistiisa iyo dariiqooyinka loogu gudbinayo maxkamada haddii ay aloosmaan khilaafyo ku saabsan arrimahan.

## Qodobka 79aad
## Shaqo Culus

1. Iyadoo looga gol leeyahay in la dhiso, la dayactiro, ama la kormeero shaqooyinka iyo agabka biyaha ee danta guud waxa dhici karta in lagu soo rogo shaqo culus oo la xidhiidha qayb kasta oo dhulka ah, Shaqadaa culus waxa loo maaraynayaa heshiis lala galayo mulkiilaha dhulka.

2. Hadii ay suurto galiwaydo in lala heshiiyo Wasaaradda awooda u lehi waxay xaq u leedahay in ay xayiraad dan guud ah ku soo rogto.

3. Wasaarada awooda u lehi waxay dejin doontaa xeerhoosaadyo aan ka hor imanayn xeerkan oo qeexaya dariiqooyinka loo marayo lahaanshaaha, gudbinta, toos-toosinta, noocayada shaqada culus iyo xeer nidaamiyada magdhowga.
4. Shaqadaasi culus waa in la diiwaangaliyo iyadoo shahaado la siinayo ka faa'idaystaha shaqadaasi culus.

## CUTUBKA 16AAD
## QODOBO KALA DUWAN

### Qodobka 80aad
### Masuuliyada waxyeelada

1. Hay'adda awooda u leh ayaa ka masuul ah hantida lunta ama la wax-yeeleeyo, dhaawaca dadka ee kuwa maamulka shaqada ku luglihi gaystaan, taasi waxay ka dul qaadaysaa dadkaasi masuuliyada dacwada iyo maga dhawga dadka la dhaawacay iyo hantida wax yeeladu gaadhay ee ay ahayd in lagu soo dacweeyo, hadii ay ka dhalatay fal maamul, marka laga reebo taxadir xumo sida in lagu guul daraystay xeerarka badbaadada.

2. Qofka ay khusayso isagaa ka masuul ah dhaawaca shakhsiga ah iyo waxyeelada hantida ee ay sababtay khalad uu isagu sameeyay.

3. Qofka carqaladeeya nuxurada xeerkan iyo nidaamka maamulkiisa bixinayo waxa ku waajibaya lacagbixin ku salaysan waxyeelada falkiisu keenay iyo natiijooyinka ku takrifalka Xeerka Biyaha.

4. Mulkiilaha ama wakiilkiisu waxay saari karaan dhinac saddexaad masuuliyada wixii khasaare ah ama waxyeelo ah ee ay si toos ah ama aan toos ahayn u keenaan markii uu fulinayay shaqooyinka horumarinta khayradka biyaha ama baahiyaadka sharciga ah.

### Qodobka 81aad
### Ganaaxyada

1. Qofka carqaladeeya qayb ka mid ah nuxurka qodobada Xeerkan Biyaha iyo awaamiirta ama tilmaamaha lagu soo saaray xeer-hoosadyada Xeerkan Biyaha, ama is hortaaga sarkaal ama qof magaciisa ku matalaya si uu u fuliyo hawlgal, ka dib

marka uu siiyo digniin sarkaalka loo xilsaaray waxa ku waajibaya ganaax bilow ah iyo mid kale oo loogu darayo maalin kasta oo ka hor imashuhu sii socodaba.

2. Qofka marka lagu fuliyo ku xadgudubka sida uu dhigayo qodobkan faqradiisa 1aad, haduu mar kale ku kaco isla falkii waxa ku waajibaya ganaax ah laba jibaarka kii hore.

3. Qofka si toos ah uga horyimaada nuxurka Xeerkan Biyaha iyadoo loo eegayo sida ay u kala culusyihiin ku xadgudubka iyo ku celcelintiisaba waxa lagu xukumayaa xadhig dhan 12 bilood iyo ganaax sida ku xusan qodobkan faqradiisa 2aad.

4. Hayadda awooda u lehi waxay soo saari doontaa xeer-hoosaad ama ogaysiimo si sharci ah loo faafin doono oo khuseeya ganaaxyada iyo xadhigga ku haboon carqaladaynta qodobada Xeerka Biyaha.

## Qodobka 82aad
## Laalis/burin

**1.** Dhamman wixii shuuruuc iyo xeer hoosaad ah ee ku saabsan arrimaha biyaha ee hore u jiray waa la laalay haddii ay ka hor imanayaan sharcigan biyaha qaranka

(Null and void)

**2.** Waxa la tirtiray Qodobka 71aad farqadiisa 3aad xarafkiisa (A),(B),(C), waxa kaloo xarafka D loo bedelay Sidan ee xeerka ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer LR . 23

D. Maareeyaha iyo mareeyo ku xigeenka Degmooyinka waxa magacaabaya Wasiirka Biyaha markuu la tashado Madaxwaynaha. Marka laga reebo Mareeyaha iyo Maareeye ku xigeenka caasimada Hargaysa oo uu si toosa Madaxwaynuhu u magacaabayo marka uu la tashado Wasiirka Wasaarada Biyaha.

## Qodobka: 83aad
## Dhaqan Galka Xeerka

Xeerkani wuxuu si rasmi ah u dhaqan-gelayaa marka labada Gole ansixiyaan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliland-na uu saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.**